KU DHAQAN XAFIIS D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الرسمية الجريدة

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 1aad Muqdisho, 20 June 2012 L. 6

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimadu: Waa $ 10 Doollar lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa $100 Doollar Soomaaliya gudaheeda – dibaddeedana waa $ 150 Doollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo waxii ka yar waa $ 0.20 doollar – Rukunka iyo qoritaanku waxaa la waydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda

## KOBNIIN

### BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

W.M.

### BOGGA LABAAD

### XEER

PRESIDENTIAL DEGREE, SOMALI REPUBLIC Lr. 272, Date 29/11/2011
**Nomination of National Director of Somali National Mine Agency** *Bog* 4

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 046, taariikh 16/02/2012
**Magacaabis Degmo Cusub** *Bog* 4

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 047, taariikh 16/02/2012
**Magacaabis Degmo Cusub** *Bog* 5

KU DHAQAN XAFIIS D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

| Sanadka 1aad | Muqdisho, 20 June 2012 | L. 6 |
|---|---|---|

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimadu: Waa $ 10 Doollar lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa $100 Doollar Soomaaliya gudaheeda – dibaddeedana waa $ 150 Doollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo waxii ka yar waa $ 0.20 doollar – Rukunka iyo qoritaanku waxaa la waydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

W.M

## BOGGA LABAAD

## XEER

PRESIDENTIAL DEGREE, SOMALI REPUBLIC Lr. 272, Date 29/11/2011
**Nomination of National Director of Somali National Mine Agency** *Bog* **4**

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 046, taariikh 16/02/2012
**Magacaabis Degmo Cusub** *Bog* **4**

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 047, taariikh 16/02/2012
**Magacaabis Degmo Cusub** *Bog* **5**

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 048, taariikh 16/02/2012
**Magacaabis Degmo Cusub** *Bog* 6

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 111, taariikh 12/04/2012
**Magacaabis Degmo Cusub** *Bog* 6

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 120, taariikh 12/04/2012
**Magacaabis Degmo Cusub** *Bog* 7

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 121, taariikh 12/04/2012
**Magacaabis Degmo Cusub** *Bog* 8

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 130, taariikh 22/04/2012
**Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya iyo Sharciga Hay'adaha Maaliyadda ee Soomaaliya** *Bog* 9
**Lifaaq: Sharciga Bankiga dhexe ee Soomaaliya**

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 147, taariikh 05/05/2012
**Magacaabid Guddiga dib u eega Xukunada Maxaabiista** *Bog* 43

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 156, taariikh 05/05/2012
**Magacaabid Ku-Xigeenka Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada** *Bog* 44

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 197, taariikh 23/05/2012
**Meel-marinta Go'aanka ka soo baxay Shirka Wadatashiga Saxiixayaasha ee Addis-Ababa, Itoobiya** *Bog* 45

PRESIDENTIAL DEGREE No. 173, date 28/05/2012
**The Establishment of the independent Anti-Corruption Commission** *Bog* 46

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 173, taariikh 28/05/2012
**Magacaabis Guddiga La-dagaallanka Musuqmaasuqa** *Bog* 47

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 177, taariikh 29/05/2012
**Magacaabid Guddoomiyaha Hay'adda Maareynta Masiibooyinka Qaranka** *Bog* 49

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 202, taariikh 14/06/2012
**Laalid Qodobbada Qaarkood ee Axdiga KMG** *Bog* 50

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 204, taariikh 14/06/2012
**Dib ugu celin Hanti Maguurto ah ee Dhaxaltooyadii Marxuum S/Guuto Salaad Gabayre Kediye, Marxuum S/Guuto Maxamed Caynaanshe Guuleed Iyo Cabdulqaadir Dheel** *Bog* 51

# BOGGA SEDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

### W. M

PRESIDENTIAL DEGREE, SOMALI REPUBLIC Lr. 272, Date 29/11/2011
**Nomination of National Director of Somali National Mine Agency**

PRESIDENT OF SOMALIA

**After considering:** - Article 39, Para 2 and Article 44 Para 1 (e) the transitional Federal Charter (TFC)

**After Considering:**- The integrity and Experiences shown by Mr. Mohamed Abdulkadir Ahmed

**After Recognizing:** The need for appointing a National Director of Somali National Mine Action Agency (SNMAA)

**Decrees the Following**

**Article 1**

On the data the President signs this degree, Mr. Mohamed Abdulkadir Ahmed is appointed as Somalia's National Director of Somali National Mine Action Agency.

**Article 2**

This degree takes effect on the day it is signed by the President of the Somali Republic and will be published in the Official Bulletin of the Somali Republic.
MUQDISHO 29/11/2011

President of Somalia

*H.E. Sharif Sheikh Ahmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 046, taariikh 16/02/2012
**Magacaabis Degmo Cusub**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:** - Qodobka 39aad, Xarafka "a" iyo faqrada 2aad ee isla qodobkaan ee Axdiga FKMG ah

**Markuu arkay:** - Xeerka Lr. 6 ee 12ka Febraayo 1980

**Markuu arkay:**- Warqadda Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Amniga Qaranka Lr. WAG&AQ/XW/0160/12 ee February 14, 2012 kuna saabsan soo jeedin Magacaabid Degmo

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan soo socda.**

**Qodobka 1aad**

Waxaa la oggolaaday in Ceel-Cali oo ka tirsan Gobolka Hiiraan loo aqoonsado Degmo laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 16, February 2012.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MUQDISHO 16/02/2012

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 047, taariikh 16/02/2012
**Magacaabis Degmo Cusub**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad, Xarafka "a" iyo faqrada 2aad ee isla qodobkaan ee Axdiga FKMG ah

**Markuu arkay: -** Xeerka Lr. 6 ee 12ka Febraayo 1980

**Markuu arkay:-** Warqadda Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Amniga Qaranka Lr. WAG&AQ/XW/0166/12 ee February 14, 2012 kuna saabsan soo jeedin Magacaabid Degmo

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan soo socda.**

**Qodobka 1aad**

Waxaa la oggolaaday in **Buqda Aqable** oo ka tirsan Gobolka **Hiiraan** loo aqoonsado Degmo laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 16, February 2012.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MUQDISHO 16/02/2012

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 048, taariikh 16/02/2012
**Magacaabis Degmo Cusub**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad, Xarafka "a" iyo faqrada 2aad ee isla qodobkaan ee Axdiga FKMG ah

**Markuu arkay: -** Xeerka Lr. 6 ee 12ka Febraayo 1980

**Markuu arkay:-** Warqadda Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Amniga Qaranka Lr. WAG&AQ/XW/0169/12 ee February 14, 2012 kuna saabsan soo jeedin Magacaabid Degmo

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan soo socda.**

**Qodobka 1aad**

Waxaa la oggolaaday in **Jameeca Jilyaale** oo ka tirsan Gobolka **Sh/dhexe** loo aqoonsado Degmo laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 16, February 2012.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MUQDISHO 16/02/2012

Madaxweynaha J. Soomaaliya
*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 111, taariikh 12/04/2012
**Magacaabis Degmo Cusub**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad, Xarafka "a" iyo faqrada 2aad ee isla qodobkaan ee Axdiga FKMG ah

**Markuu arkay: -** Xeerka Lr. 6 ee 12ka Febraayo 1980

**Markuu arkay:-** Warqadda Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Amniga Qaranka Lr. WAG&AQ/XW/0175/12 ee February 14, 2012 kuna saabsan soo jeedin Magacaabid Degmo

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan soo socda.**

**Qodobka 1aad**

Waxaa la oggolaaday in **Leego** oo ka tirsan Gobolka **Sh/hoose** loo aqoonsado Degmo laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 12 April 2012.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MUQDISHO 12/04/2012

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 120, taariikh 12/04/2012
**Magacaabis Degmo Cusub**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad, Xarafka "a" iyo faqrada 2aad ee isla qodobkaan ee Axdiga FKMG ah

**Markuu arkay: -** Xeerka Lr. 6 ee 12ka Febraayo 1980

**Markuu arkay:-** Warqadda Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Amniga Qaranka Lr. WAG&AO/XW/0176/12 ee February 14, 2012 kuna saabsan soo jeedin Magacaabid Degmo

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan soo socda.**

**Qodobka 1aad**

Waxaa la oggolaaday in **Beer Xaano** oo ka tirsan Gobolka **J/Hoose** loo aqoonsado Degmo laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 12 April 2012.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MUQDISHO 12/04/2012

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 121, taariikh 12/04/2012

**Magacaabis Degmo Cusub**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad, Xarafka "a" iyo faqrada 2aad ee isla qodobkaan ee Axdiga FKMG ah

**Markuu arkay: -** Xeerka Lr. 6 ee 12ka Febraayo 1980

**Markuu arkay:-** Warqadda Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Amniga Qaranka Lr. WAG&AQ/XW/0238/12 ee March 27, 2012 kuna saabsan soo jeedin Magacaabid Degmo

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan soo socda.**

**Qodobka 1aad**

Waxaa la oggolaaday in **Raaskaambooni** oo ka tirsan Gobolka **J/Hoose** loo aqoonsado Degmo laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 12 April 2012.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MUQDISHO 12/04/2012

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 130, taariikh 22/04/2012
**Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya**
**iyo Sharciga Hay'adaha Maaliyadda ee Soomaaliya**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobk 39aad, faqradda 2aad ee Axdiga KMG ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

**Markuu arkay:-** Qodobka 3aad, Xarafka "C" ee Axdiga KMG ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

**Markuu tixgeliyay:** - Go'aanka Baarlamaanka ee XG/KX1B/435 ee 04/08/2011 iyo XG/KX1B/425 ee 28/09/2011 kuna saabsan Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya iyo Sharciga Hay'adaha Maaliyadda oo dib u habeyn lagu sameeyay.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya saxiixo waxaa dhaqan galaya sharcigan cusub ee Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ee dib-u-habeynta lagu sameeyay.

**Qodobka 2aad**

Wuxuu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya ansixiyay Sharcigan cusub ee Hay'adaha Maaliyadda

Soomaaliya oo dib-u-habeyn lagu sameeyay.

**Qodobka 3aad**

Waxaa sharcigan lagu baabi'iyay wixii sharci ahaa ee ka hor imaanaya.

**Qodobka 4aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galaya hal bil kaddib markii lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MUQDISHO 22/04/2012

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

*JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA*

*Bankiga Dhexe ee Soomaaliya*

# SHARCIGA DHISMAHA BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

Sharciga Dhismaha Bankiga Dhexe ee Lr. 3 ee Juun 30, 1960 ee Bankiga Qaranka Soomaaliyeed, dibna loogu habeeyay Lr. 6 ee October 19, 1968. Dib looga bedelay Magacii loona bixiyay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya. Sharci no. 21 Tar. 8 Febraayo 1975 loogana bedelay Magacii hore ee Bankiga Qaranka Soomaaliyeed (Somali national bank).

**8/3/2011**

Muqdisho Soomaaliya

## TAXANAHA QODOBADA

**QAYBTA Iaad, HORDHAC**

1. MAGAC GAABAN
2. FASIRAADA ERAYADA

**QAYBTA 2AAD, ASAAS, DASTUUR IYO UJEEDOOYIN**

3. ASAASKA BANKIGA, MAQAAMKIISA SHARCI IYO MADAX BANAANIDA BANKIGA
4. AHDAAFTA/UJEEDOOYINKA BANKIGA
5. WAX QABADKA/XILKA BANKIGA
6. XARUNTA IYO LAAMAHA
7. WAKIILADA
8. CANSHUUR DHAAF

**QAYBTA 3AAD, RAASUMAAL**

9. RAASAMAALKA LA OGOLAADAY EE BANKIGA

**QAYBTA 4AAD, MAAMULKA BANKIGA**

10. GUDDIGA MAAMULKA
11. XUBNAHA GUDDIGA MAAMULKA
12. MAGACAABIDDA XUBNAHA GUDDIGA MAAMULKA
13. GUDDOMIYAHA IYO GUDDOMIYE KU-XIGEENKA
14. CASILAADDA XUBNAHA GUDDIGA MAAMULKA
15. AWOODAHA IYO WAX QABADKA GUDDIGA MAAMULKA
16. AJUURADA
17. SHIRARKA GUDDIGA MAAMULKA
18. ILAALINTA SIRTA

**QAYBTA 5AAD, LACAGTA**

19. LACAGTA SOOMAALIYA
20. ISTICMAALKA LACAGTA
21. DAABACAADA LACAGTA WARQADDA AH IYO TAN SUNUUDDA AH , LACAGTA SHARCIGA AH IYO JOOJINTEEDA/BEDDELAADEEDA
22. BADALKA WARQADAHA LACAGTA DUUGA/ GOOGODAY
23. JEEGAGA WAREEGA, QIRAAL QAAMEDYADA, KAMBIYAALAHA IWM ( BILLS OF EXCHANGE, PROMISORY NOTES IWL)

**QAYBTA 6AAD, XIRIIRKA BAARLAMAANKA, XUKUMADDA IYO HAY'ADAHA CAAMKA AH**

24. BAARLAMAANKA

25.KULAMMADA GUDDOMIYAHA IYO WASIIRKA
26. LA TALINTA XUKUMADDA
27. FARRIIMAHA DOWLADDA
28. REEBANAANTA AMAAHSIINTA DOWLADDA IYO HAY'ADAHA CAAMKA AH
29. HORUMARIN KU MEEL GAAR AH EE TOOS DOWLADDA LOO SIIYO
30.WAKIILKA DOWLADDA EE ARRIMAHA MAALIYADDA, MACAAMIL BANKIYEEDKA IYO XIRIIRKA LACAGEED EE DIBEDDA
31.XILKA WAKIIL MAALIYADEED, MACMIIL BANK IYO FULIYE XIRIIR LACAGEED EE DIBEDDA

**QAYBTA 7AAD, XIRIIRKA DIBADDA**
32. NIDAAMKA SARIFKA LACAGA QALAAD IYO KAYDKA HANTIDA DIBADA
33. MACAAMILKA DAHABKA IYO SARIFKA LACAGAHA QALAAD
34.XIRIIRKA BANGIYADA DHEXE EE DIBADA, BANGIYADA KALE EE DIBADA IYO HAY'ADAHA LACAGTA EE CAALAMIGA AH.
35.HESHIISYADA LACAG BIXINTA
36.WAKIILKA MAALIYADDA DOWLADDA IYO HAY'ADAHA LACAGTA EE CAALAMIGA AH
37.KAYD HAYE/DEPOSITORY

**QAYBTA 8AAD, XIRIIRKA BANKIGA IYO BANKIYADA KALE IYO HAY'ADAHA LACAGTA**
38. KORMEERE, BANKIGII BANKIYADA IYO ADEGYADA QAARKOOD LOO FULIYO HAY'ADAHA LACAGTA
39. AMAAHSIINTA BANKIYADA
40. KAN LOOGU IRKADO AMAAHSIINTA UGU DAMBEYSA (LENDER OF LAST RESORT)
41. ILAALINTA KAYDKA
42. HAWL-GALKA/DHAQDHAQAAQA SUUQA FURAN

**QAYBTA 9AAD, XOGTA/MACLUUMAADKA IYO TIROKOOBKA**
43. XOGTA/MACLUUMAADKA BANGIYADA IYO KUWA HAY'ADAHA LACAGTA
44. TIROKOOBKA IYO XOGTA KASOO JEEDA QOF SHAKHSI AH AMA SHARCIYAYSAN

**QAYBTA 10AAD, XISAAB KALA GUDASHO, LACAG IYO HABKA SAAMIYO KALA WAREEGIDDA**
45. TAS-HIILAAD, SHATI/ RUKHSAD SIINTA, IYO KORMEERKA

**QAYBTA 11AAD, MAALIYADA ARRIMAHA LOOGA BAAHANYAHAY**
46. SANAD XISAABEED
47. WARBIXIN SANADEED, TILMAAN XISAAB XIR BILEED
48. XISAABAADKA, BAARISTA IYO MIISAANIYADDA
49. KAYDKA GUUD IYO DIB U QIIMAYNTA XISAABAADKA KAYDKA AN LA HELIN
50. FAAIDADA SANADKA LA QAYBSAN KARO
51. HOOS U DHAC RAASUMAAL

**QAYBTA 12AAD, XEER HOOSAAD IYO KORMEER**
52. QAABKA AMARRADA KORMEERKA BANKIGA
53. BAAHINTA XOGWARANKA/AMARRADA KORMEERKA

**QAYBTA 13AAD, FAAFINTA SIYAASADDA LACAGTA IYO WARBIXINNADA KALE**
54. BAAHINTA SIYAASADDA LACAGTA
55. FAAFIN KALE

**QAYBTA 14AAD, ARRIMO KALA DUWAN**
56. FALAL KALE OO REEBAN
57. KA XAFIDAAD QAAN/MAS'UULIYAD SHAKHSI AH
58. NASAKHAAD/DHAQAN BEELID

**QAYBTA 15AAD, QODOBADA KALA GUURKA AH**
59. MAGACAABIDA HORE EE XUBNAHA GUDDIGA MAAMULKA
60. XEER KA SOO SAARID SHARCIGAN
61. FAAH FAAHINTA SIYAASADA NAQDIGA/LACAGTA
62. ADEEGYADA GUUD EE BANKIYADA

**QAYBTA 16AAD, GUNAANAD**
63. DHAQAN GALKA SHARCIGAN

# QAYBTA 1AAD,
# HORDHAC

## 1. CINWAAN GAABAN

Sharcigan waxa lagu Magacaabayaa Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya

## 2. Fasiraada Erayada

Haddii ujeeddada guud si kale u akhrismin, sharcigan dhexdiisa " Banki" waxaa loola jeedaa Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ee lagu aas-aasay sharcigii Lr. 3 ee 30kii Juun 1960 iyo kii dib loogu habeeyay ee Lr. 6 ee 19 oktober 1968, iyo sharci no. 21 febraayo 8, 1975 oo looga bedelay magacii lagu asaasay ee National Bank of Somalia.(Banca Nazionale Somalo).

**"Bank"** waxa loola jeedaa hay'ad leh jiritaan qaanuuni ah oo ku shaqaynaysa ruqsad magaceeda leh, ama wakaalad cid kale oo Ruqsad Bank uu Bankiga dhexe u siiyay inay ka hawl gasho gudaha Soomaaliya, ama meel kale sida uu dhigayo sharciga Bankiga dhexe.

**"Guddiga ama Guddiga maamulka"** waxa loola jeedaa Guddiga Maamulka Bankiga ee sida Qaybta 4aad ee sharciga Bankiga ku cad.

**"Lagu badali karo lacag kasta"** waxa loola jeedaa sarifka si madax bannaan loogu gorgortami karo ee lagu sarifi karo suuqyada/sayladaha aduunka.

**"Lacag"** waxa loola jeedaa shilin Soomaaliga ama lacag kasta oo qalaad/dibadeed.

**"Lacag Soomaali"** waxa loola jeedaa shilin Soomaaliga.

**"Hay'ad lacageed"** waxa loola jeedaa shirkad/kambani amma cid kale oo leh jiritaan qaanuuni/shakhsiyad sharciyeed oo ku shaqaysa magaceeda ama wakaalada cid kale oo ganacsi lacageed leh hawlaha, ay ka midka yihiin xawilaada/dirida kaashka, oo Bankigu shati u siiyay inay ka shaqeeyaan gudaha ama dibada Soomaaliya sida uu dhigayo sharciga Bankigu.

**"Lacag Qalaad"** waxa loola jeedaa lacag warqado ama sunuud ah, oo ka sharciyaysan ama mar ka sharciyaysnayd dal kale oo Soomaaliya ka baxsan, iyadoo sharci ka ah/ka ahayd in la qaato, amma lagu bixiyo dayn ama la galiyo xisaab banki gudaha Soomaaliya amma dal kale oo dibada ah.

**"Wasiir"** waxa loola jeedaa Wasiirka Maaliyada ee Soomaaliya **"An degganayn"** waxa loola jeedaa qof ama shakhsi qaanuuni oo aan dalka Soomaaliya daganayn/ku noolayn.

**"Lacag Bixin"** Waxa loola jeedaa lacag wareejin ujeedadeedu tahay dayn bixin, ama hadiyad ama deeq ahaan ama dhigitaan/dhito xisaaabeed banki ama hay'ad lacageed oo lagala bixi/saari karo mustaqbalka.

"Macaamil lacag bixin" waxa loola jeedaa lacag bixin kasta oon ka ahayn Raasamaal wareejin waxana ka mid ah:

- Lacag bixin ganacsi la xiriirta
- Lacag bixin la xiriirta dulsaar dayn ama xaasilka dakhli laga helay maalgalin;
- Lacag bixin la xiriirta haftooyin dayn celin ama qiima dhac toos ah;
- Lacag xawaalo taageero ama kharash qoys/qof "hannaanka lacag bixinta" waa qaabka, nidaamka, xeerarka iyo habka la isku weydaarsado lacag bixinta

**"Madaxwayne"**waxa loola jeedaa madaxwaynaha Soomaaliya.

Hay'ad caam ah" waxa loola jeedaa xukuumada, maamul deegaanada Soomaaliya, ama hay'ad caam ah oo kale, uu magacaabay wasiirku, kadib markuu u soo jeediyay Bankigu in sharcigan dhexdiisa loo oqoonsado hay'ad caam ah.

**"Deggane"** waxa loola jeedaa:

- Qof ajnabi ah oo si joogta ah ugu sugnaa soomaaliya ugu yaraan mudo hal sano ama ogeysiiyay/wargaliyay saraakiisha socdaalka ee Soomaaliya doonitaankiisa inuu ugu yaraan mudo hal sano ah ku noolaado Soomaaliya lana ogolaaday;
- ama saraakiisha shirkad ama hay'ad kale oo xarunteeda dhexe/koowaad Soomaaliya ku taal,
- ama laamaha shirkad ama hay'ad kale oo soomaaliya ganacsi ka wada oo xarunteeda dhexe ku taal dibada Soomaaliya, waxana ka reeban kuwa la sheegayo Diblamaasiyiinta safaaradaha dalalka shisheeye ama saraakiishooda ka tirsan ee rasmi ahaan loo aqoonsaday ama hay'ad kale oo lagu aasaasay heshiis caalami ah gudaha ama dibadda Soomaaliya ama saraakiisheeda Rasmi ahaan loo aqoonsaday

**"settlement"** waa ficilka ay labo dhinac ama dhinacyo ka badan ku kala gudanayaan lacag kala qaadasho ama lacag qaameedyo.

## QAYBTA 2aad,

## Aasaaska, Dastuurka iyo ujeedooyinka Bankiga

### 3. Aasaaska Bankiga, maqaamkiisa sharci iyo madaxbanaanidiisa

1. Bankiga waxaa lagu magacaabi doona Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ama magac kale oo ugu dhigma af-qalaad

2. Bankigu wuxu noqon doonaa shirkad/hay'ad leh jiritaan sharci oo taxana ah iyo astaan Gaar ah, isagoo leh awoodaha inuu kasbado, yeesho/lahaado, haysto, bixiyo/wareejiyo hanti, galo heshiisyo, magaciisana cid ku dacweeyo laguna dacwayn karo
3. Bankigu wuxu qaban doonaa hawl banki dhexe oo kasta haddaan si qeexan loogu diidin sharcigan, isla markaana wuxu lahaan doonaa dhamaan awoodaha iyo xuquuqaha uu banki dhexe leeyahay
4. Si uu u hanto nidaam haboon iyo maarayn suuban Bankigu wuxu samaysan doonaa xeer hoosaadyada dhaqan galinta hawlgalkiisa iyo nidaam an ka hor imanaynin qodobada sharcigan
5. Bankiga ma qaban doonaan sharciga shirkadaha/kambaniyada ama xeerarka Bankiyada lagu maamulo ee ku qeexan sharciga Hay'adaha Lacagta.
6. Marku hiigsanayo ujeedooyinkiisa iyo marku hawlahiisa fulinayaba bankigu wuxu noqonayaa mid madax bannan, la xisaabtankiisuna waa sida sharcigani dhigayo. Haddii aan si kale loogu qeexin sharcigan, xubnaha Guddiga Maamulka Bankiga iyo shaqaalihiisaba cid kale iyo xukuumadda toona kama amar qaadan doonaan. Madax banaanida Bankigu waxay noqonaysa mid la dhawro mar kasta, qof kalena ama shakhsi qaanuuni ah waa ka reebantahay inuu jaheeyo ama saamayn ku yeeshoo xubnaha go'aan-qaadashada ama shaqaalaha Bankiga markay hawshooda gudanayaan faragelinna laguma samayn karo xilkooda ama howlfulintooda.

**4. Ujeedooyinka/ahdaafta Bankiga**

1. Ujeeddada koowaad ee Bankiga waxay noqon doontaa hanashada iyo sugidda/xasilinta ascaarta dalka gudihiisa.
2. Ujeedada labaad ee Bankiga, waxay noqon doontaa kobcinta/sare u qaadida iyo sugitaanka nidaam maaliyadeed oo ku salaysan tartanka suuqa xorta ah oo deggan.
3. Iyadoo aan waxba loo dhimaynin labada ujeeddo ee sare ku xusan, Bankigu wuxu caawindoonaa siyaasadda dhaqaalaha guud ee Xukuumadda

5. **Wax Qabadka/xilka Bankiga**

Bankigu Wuxu fulinayaa:

a. Dejinta iyo hirgalinta siyaasada lacagta/naqdiga ee Qaranka iyo hirgalinta siyaasada sarifka lacagaha qalaad,
b. Haynta iyo maaraynta kaydka lacagaha qalaad ee Somalia

c. Kormeerka iyo shati/ruqso siinta bankiyada iyo hay'adaha lacagta iyo xaqiijinta wareeg lacageed iyo isbixin hannaan lacageed oo tayo iyo xasilloni leh.
d. Dejinta iyo hirgalinta siyaasadaha ugu haboon aasaaska,
e. maamulka iyo kormeerka nidaam miro-dhal ah islamarkaana hufan oo lacag bixineed iyo xaqiijinta nidaam xisaab iyo qaan kala gudasho.
f. Markii loo baahdana inuu Bankigu maamulo bixinta lacagaha iyo habka xisaab isdhaafsiga/kala gudashada
g. wuxuu qaban doonaa xukuumadda iyo hay'adaha kale ee caamka ahba shaqooyinka macmiil banki, la taliye iyo wakiil miisaaniyadeed
h. Bankigu waa soo saaraha keliya ee lacagaha sharciga ah sida warqadda ama sunuudda ah.
i. Bankigu wuxuu soo saarayaa, faalaynayaa, baahinayaa arrimaha iyo tirokoobka ascaarta, siyaasadda lacagta/naqdiga, wax isdhafsiga ganacsiga/dhaqaalaha dibedda iyo tilmaamaha tirokoobka waaxyaha kale ee dhaqaalaha dalka.

**6. Xarunta dhexe iyo Laamaha**

1. Xarunta dhexe ee Bankigu waxay noqondoontaa Muqdisho, hasa yeeshee mudada xaalad qaran oo degdeg ah lagu jiro haddii aan madaxwaynuhu si kale ku amrin wuxu Bankigu xarun dhexe oo kumeel gaar ka dhigan karaa meel kale oo dalka Soomaaliya gudihiisa ah ama dibadiisaba ah.

Bankigu marka uu tixgeliyo baahidiisa howlfulin wax ku ool ah oo waqti kasta wuxu ka furan karaa ama xiri karaa laamo meel kastoo Soomaaliya ka mid ah.

**7. WAKIILO**

Guddiga Maamulka Bankigu wuxu magacaabi karaa wakiilo ama xiriiriye ku sugan gudaha ama dibadda Jamhuuriyadda Soomaaliya.

**8. CANSHUUR DHAAF**

a. Bankiga waxa laga dhaafayaa dhamaan canshuuraha dekadaha iyo kuwa dakhliga ama faa'idada iyo canshuuraha kale ee la xiriira soo waarididda dahabka dalka gudihiisa loo isticmaalayo iyo lacagta warqadda iyo tan sunuudda.
b. Bankiga waxa laga dhaafayaa dhamaan canshuuraha kale ee sharcigu ka dhaafay wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee caamka ah.

## QAYBTA 3aad,
## RAASUMAAL

### 9. RAASUMAALKA LA OGOLAADAY EE BANKIGA

1. Raasamaalka la oggolaaday islamarkaana lawada gatay lana bixiyay wuxu noqon doonaa ……….. (Qiyaasta Raasumaalka, waxaa lagu soo saari doonaa xeer gaar ah oo Golaha wasiiradu soo saareen, oo ka mid noqon doona sharcigan) oo shilin Soomaali ah. [1]
2. Lahaansha/mulkiyada dhamaan raasumaalka la bixiyay ee Bankiga waxa laga lahaan doonaa Wasaarada Maaliyada 3. Raasamaalka la bixiyay ee Bankiga marna lama dhimi karo.
3. Rasaamaalka la ogolaaday ee Bankiga waxa lagu kordhin karaa hadba intaa uu soo jeediyo Guddiga Maamulka Bankigu islamarkaana Xukuumaddu ansixiso.

## QAYBTA 4aad,
## Maamulka

### 10. Guddiga Maamulka

Guddiga Maamulku wuxu mas'uul ka yahay dejinta iyo hirgelinta siyaasadaha iyo waliba kormeerka maamulka iyo hawlgalka Bankiga

### 11. XUBNAHA GUDDIGA MAAMULKA

1. Guddiga Maamulku wuxu ka koobnaan doonaa:
   a. Guddomiyaha bankiga oo noqondoonaya gudoomiyaha Guddiga
   b. Guddomiye ku xigeenka oo noqondoono gudoomiyaha Guddiga markuu maqan yahay guddoomiyaha.
   c. iyo shan xubnood oo kale oo aysan ka mid ahayn agaasimayaasha fulinta

### 12. Magacaabidda Xubnaha Guddiga Maamulka

1. Qofka waxaa loo magacaabi karaa xubin Guddiga Maamulka haddii ku sifeysanyahay hufnaanta ugu sarreysa iyo:
   a. Inuu yahay muwaadin Somaliyeed
   b. Haysto shahaado jaamacadeed ama leeyahay aqoon iyo khibrad u dhiganta xagga aqoonta maaliyadda, lacagta, bankiyada, xisaabaadka, sharciga iyo dhaqaalaha iyo xirfadaha kale oo muhimka u ah shaqada Bankiga; iyo
   c. ayadoo aysan jirin sabab casilaad qofkaas sida xusan qodobka 14aad ee sharcigan.

---

[1] Sida ku cad Qiyaasta rasumaalka ee xiligii 1960kii sida ku cad sharci Lr.3 ee 30 Juunyo 1960 waxaa uu ahaa 1,000,000 So.Sh.

2. Qofna uma qalmi karo in lagu magacaabo Guddomiye ama Guddomiye ku xigeen haddii:
   a) uusan ku haysan shahaado jaamacadeed arrimaha maaliyadda, lacagta, bankiyada, xisaabaadka, sharciga ama dhaqaalaha
   b) uusan lahayn khibrad 12 sano dhinacyada dhaqaalaha, bankiyada, maaliyadda ama sharciga; iyo
   c) inuu ka soo qabtay darajooyin sare Dowladda, hay'adaha hantida gaarka ah ama kuwa caalamiga ah.
3. Guddomiyaha, Guddomiye ku xigeenka iyo xubnaha guddiga maamulka, waxaa magacaabaya Madaxweynaha, oo ku socda talo soo jeedinta golaha wasiirrada, midwalbana wuxuu xilka haynayaa muddo afar sano ah oo loo cusboneysiin karo, ayadoo Guddomiye, Guddomiye ku xigeen ama xubin Guddi Maamul xilka hayn Karin wax ka badan laba xilli (terms)
4. Xubin kasta oo ka mid ah Guddiga Maamulka waa iska casili karta xilka ayadoo istiqaalo qoraal ah ku hagaanijeysa Madaxweynaha taasoo dhaqan geleysa bil kaddib marka istiqaaladu Madaxweynaha gaarto.
5. Haddi Guddomiyaha, Guddomiye ku xigeen ama xubin kale oo Guddiga Mamulka ka mid ah geeriyoodo, is-casisho ama sabab kaleba ugu banneyo jagada inta ayan muddadii xilligu dhammaan, Madaxweynuhu asagoo cuskanaya talo soo jeedinta Golaha Wasiirrada, wuxuu magacaabayaa qof kale oo buuxiya muddada jagada bannaanatay ka hartay xilligeedii.
6. Haddi Guddomiyaha, ku xigeenkiisa ama xubin Guddiga Maamulka ka mid ah awoodi weydo iney gudato waajibaadka xafiiskeeda taasoo ay ku wacantahay awood beelid xilli dheer jiri karta awgeed, Madaxwaynuhu, isagoo ka tixgelinaya talo bixinta aqlabiyada xubnaha guddiga maamulka iyo soo jeedinta golaha wasiirada, wuxuu magacaabi doonaa badalkiisa xubin kale oo yeelan doona dhamaan awoodihii xubinta hore ilaa inta Madaxwaynuhu ka go'aaminayo inay dhamaatay karti beelki xubinta hore, isagoo tixraacaya cadeymaha uu ka helay Guddi Takhaatiir lagu kalsoon yahay.

**13. Guddomiyaha iyo Guddomiye kuxigeenka**

1. Guddomiyuhu wuxu noqon doona madaxa fulinta ee Bankiga isla markaana isagoo raacaya go'aanada iyo siyaasada guud ee Guddiga maamulka wuxuu mas'uul ka yahay maaraynta Bankiga, sida agaasinka, magacaabida, iyo shaqo ka saaridda shaqaalaha hab waafaqsan hanaanka iyo shuruudaha Guddiga Maamulku u dajiyay.

Guddomiyuhu waxa kale oo u awood u leeyahay bixinta kharashyada maamulka iyo howlfulinta Bankiga si waafaqsan miisaaniyadda Guddiga Maamulku oggolaaday.

2. Guddomiyuhu waa wakiilka koobaad ee Bankiga taasoo siinaysa awoodahan.

a) Inuu matalo Bankiga Xiriiraduu la yeelanayo hay'adaha caamka ah, ashkhaasta iyo hay'adaha kaleba

b) Inuu matalo Bankiga shakhsi ahaan ama uu wakiisho qareen dacwadaha maxkamadaha hortooda ee Bankigu qayb ka yahay.

c) Inuu kaligii ama cid kale la saxiixo heshiisyada Bankigu galayo, qiimaleyda iyo damaanadaha uu Bankigu soo saarayo/daabacayo, warbixinadda, buug xisaabaadka, war baahinta kale ee maaliyada, warqadaha isgaadhsiinta iyo qoraalada kale ee Bankiga.

3. Isticmaalka shaabada/astaanta guud ee Bankiga waxa lagu fasaxayaa saxeexa Guddomiyaha iyo cidi arrintaas uu u idmay Guddomiyuhu

4. Guddomiyuhu wuxu shaabada/astaanta dhexe ee Bankiga ku awood siin karaa qof kasta inuu ku fuliyo ama ku xaqiijiyo qoraal kasta magaca Bankiga.

5. Guddomiye ku xigeenku, asagoo fulinaya amarka Guddomiyaha, wuxuu matalayaa Guddomiyaha, wuxuu isticmaalayaa awoodaha oo dhan, marka Guddomiyuhu maqanyahayna si ku meel gaar ah ama uu awood beelo xilalka sharcigani Guddomiyaha u jideeyey, wuxuuna kale oo fulinayaa xilalka gaar ahaan Guddomiyuhu u xilsaaro.

6. Shaqada iyo xilka Guddomiyaha iyo Guddomiye ku xigeenku waa xilli buuxa waana joogto. Midkoodna shaqo dana dhaqaale leh iyo mid an lahaynba ma qaban karaan haddii aan Guddiga Maamulku si gaar ah ugu fasixin.

Hayeshe arrimaha ku xusan Farqada 2aad xarafkeeda (a) ee isla qodobkan uma diidayaan Guddomiyaha ama Guddomiye ku xigeenka inay qabtaan jago ama mansab macaahid wax barasho sare oo manhaji/akadamik ah ama jago la taliyenimo ama xubin ka noqoshada gudi ama koomishin mas'uuliyad caam ah haya, ama inuu u adeego hay'ad maaliyadeed oo caalami ah oo Soomaaliyaxubin ka tahay ama Soomaaliya lug ku leedahay ama Hay'ad ku takhasustay arrimaha maaliyada oo Xukuumadu aasaastay.

7. Guddomiyuhu wuxu u wakiilan karaa mid kastoo ka mid ah awoodaha sharcigani siiyay, masuuliyiinta kale ee Bankiga ama, wixii la xiriira Farqada 2aad xarafkiisa (b) , la taliye an shaqaalaha Bankiga ka tirsanayn.

**14. Casilidda Xubnaha Guddiga Maamulka**

1. Qofna ma noqon karo xubin Guddiga Maamulka asagoo isla markaas xubin ka ah Barlamaanka, Dowladda, sarkaal wasaarad dowladeed, ama sarkaal ama shaqaale Banki ama hay'ad lacageed oo Soomaaliya xafiis ku leh ama saamiyo 5% ama dano ka badan ku leh raasumaalka hay'ad lacageed.
2. Madaxwaynuhu isagoo tixraacaya talo bixinta aqlabiyada xubnaha Guddiga Maamulka Bankiga wuxu soo afjari karaa magacaabida/xilka Guddomiyaha ama Guddomiye ku xigeenka sababaha qodobkan lagu qeexay sida:

a. ku eedeysan mid kasta oo ka mid ah sababaha xil ka qaadista ku tilmaaman faqrada 1aad;
b. lagu xukumay inuu kacay ama daynbixinwaayey, ama codsaday in laga hakiyo xaraashka ama ficilka dadka daynta ku leh ama dadka daynta ku leh u qoondeeyo qayb kasta oo ka mid ah dakhliga uu ka helo Bankiga.
c. lagu xukumay dembi ammaano darri, khiyaamo ama anshax xumo;
d. lagu xukumay ama lagu caddeyey inuu dhimir la'yahay (Jiro Xagga Maskadaxda ah);
e. Inuu ka maqnaaday saddex fadhi oo taxan shirarka Guddiga Maamulka, asagoo aan Guddiga fasax ka haysan; ama
f. noqda, sabab kasta ha ahaatee, mid karti beelay ama aan awoodi karin inuu si habbon u guto xilka xafiiskiisa
g. Xubin ka mid ah Guddiga Maamulka lagama qaadi karo xilka ayadoo aan lagu salayn sharcigan, haddii sida qodobkani xadeeyey looga qaadana sababta waa in lagu baahiyaa faafinta rasmiga.
h. Xubin Guddiga Maamulka ka mid ah haddii xilka laga qaado waxay xaq u leedahay iney u dacwooto Maxkamadda Sare 15 beri gudahood marka go'aanku soo baxay, ayadoo dadweynaha go'aanka loo baahinayo.

**15. Awoodaha iyo wax qabadka Guddiga Maamulka Bankiga**

Guddigu wuxuu go'aan Guud ama gaar ah ugu wakiilan karaa Guddiyadiisa, Qayb ka mid ah ama xubin ka ah, ama Saraakiisha, shaqaalaha, Wakiilada Bankiga inay ku shaqeeyaan hawlgalada ama shaqooyinka Guddiga Maamulka Bankiga, sida ku xusan qaanuunka ama sharci kale oo qaran marka la reebo qaybaha soo socda oo aan guddigu cidna u wakiilan karin:

a. Dejinta iyo ansixinta Siyaasada Maaliyada Bankiga, oo ay ka mid yihiin go'aanada la xiriira yoolka Maaliyadeed ee mudada dhexe, go'aaminta xaddiga dulsaarka, kobcinta kaydka Soomaaliya iyo inay fuliyaan Xeer hoosaadyada iyo meelmarintooda.

b. Dejinta iyo ansixinta Siyaasada Bankiga ee la Xiriirta fulinta shaqooyinka iyo ansixinta hadba Xeer hoosaadyada ku haboon ee lagu hirgelinayo.

c. Go'aaminta iyo fulinta siyaasadda Sarrifka Lacagaha Qalaad.

d. Kormeerka iyo hergelinta siyaasada Bankiga iyo fulinta hawlaha Bankiga

e. Ruqsad/laysan siinta iyo ka qaadida Bankiyada iyo Hay'adaha Maaliyada.

f. ansixinta xeer hoosaadyada bankigu soo saarayo

g. Hirgelinta soo jeedinaha aqlabiyadda ku xusan Qodobada 12aad faqradiisa 6aad. 14aad faqradiisa 2aad.

h. Go'aaminta goobaha Laamaha laga furayo, Xafiisyada Wakiilada iyo Goobaha hawl fulinta.

i. Soo jeedinta kordhinta Raasamaalka.

j. Ansixinta Miisaanayad Sannadeedka Bankiga.

k. Ansixinta warbixin sanadeedka, ansixinta warbixinta Maaliyada Iyo ansixinta warbixinada kale ee Rasmiga ah iyo warbixinada xaalada Maaliyadeed ee Bankiga.

l. Magacaabidda Madaxa hantidhowrka gudaha iyo hantidhowrada Dibedda ee Bankiga.

m. Go'aaminta qayabaha hantida Raasamaalka kaydka dibedda rasmiga ah ee Soomaaliya.

n. Go'aaminta qaybaha ku haboon maalgelinta hantida Bankiga

o. Ansixinta ama diidmada shati/ruqso siinta, isogolaysiinta iyo abuuridda nidaamka xalinta xisaabaha, qaan kala gudashada iyo hannanka isla meel dhigidooda.

p. Go'aaminta noocyada iyo naqshadaha warqadaha lacagta, sunuuda iyo suuq gelintooda iyo maareyntooda

q. Odoroska dhibta ku imaan karta Bankiga iyo diyaarinta Istraatiijada lagaga hortagi karo , hawlaha socodsiinta iyo amniga Bankiga; iyo

r. Ansixinta xeerarka iyo amarrada howlfulinta Guddiga Maamulka

**16.Gunnooyinka iyo Mushahaarooyinka Guddomiyaha iyo Ku xigeenku**

1. Gunnooyinka iyo mushahaarooyinka ay qaataan Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku Xigeenka Waxay noqonayaan kuwo la mid ah kuwa ay qaataan shaqsiyaadka jagooyinka fulineed oo u dhigma ka haya hay'adaha Maaliyadda oo waaweyn, waxaana lagu soo bandhigi doona warbixin sanadeedka.

2. Guddoomiyaha, Guddoomiye Xigeenka iyo beddelkooda kasta ee lagu magacaabay, sida ku xusan Qodobka 13aad faqradiisa 6aad waxaa Bankigu siinayaa Mushahaarooyin iyo Gunooyin oo uu go'aaminayo waqti Ilaa waqti Madaxweynuhu isagoo eegaya soo jeedinta Golaha Wasiirada, iyadoo Mushahaarooyinka iyo Gunooyinkaba aan wax laga dhimi karin mudada ay xilka xafiiska hayaan.
3. Xubnaha Guddiga Maamulka aan fuliyeyaasha ahayn iyo beddelkooda kasta oo lagu Magacaabay Qodobka 12aad faqradiisa 6aad. waxaa Bankigu siinaya gunnooyin fadhi Sida uu u go'aamiyo Madaxweynuhu isagoo tixgelinaya soo jeedinta talada golaha wasiiradda.

**17. Shirarka Guddiga Maamulka**

1. Guddoomiyahu isagoo ah shir guddoonka Guddiga Maamulka Bankiga wuxuu u yeedhi kara shirarka guddiga ugu yaraan labadii bilood hal mar, ama mar kastoo shaqada Bankigu u baahato ama mar kastoo ay qoraal kaga codsadaan ugu yaraan saddex xubnood oo ka mid Guddiga Maamulka Bankiga.
2. Ansaxnimada shirarka Guddiga wuxuu ku buuxsamaya Gudoomiyaha ama Guddoomiye ku Xigeen iyo Saddex xubin kale oo Guddiga Maamulka Bankiga.
3. Go'aanada Shirarka Guddiga Maamulka Bankigu waxay ku ansaxayaan aqlabiyada codadka inta markaas joogta, hadday Barbardhac noqoto, Guddoomiyaha ama Guddoomiye ku Xigeenka ee shirka guddoominaya ayaa laba cod ama codka kala saarka yeelanaya.
4. Xubin kasta oo laga cod batay waxay xaq u leedahay in afeef loo diiwaangeliyo ay ku caddeynayso go'aanka la habboonaa in la qaato iyo sababta ay sidaa ula tahay.
5. Habsami u socodka hawlaha shirarka guddiga waxay noqonayaan sir. Guddigu waxay go'aamin karaan in qaraarka ka soo baxay falanqaynta la shaaciyo. Waxay degdeg u baahinayaan go'aammada la xiriira habaynta Siyaasada Lacagta iyo arrimaha siyaasada Guud oo Bankiga.
6. Qaraarada shirarka Guddiga waxaa saxeexaya qofka Shir Guddoonka iyo Xoghayaha Guddiga.
7. Xoghayaha Guddiga waxaa magacaabaya Guddiga isagoo eegaya Soo jeedinta Guddoomiyaha Bankiga ,wuxuuna ka imaanaya Saraakiisha Sare ee Bankiga kamana mid noqon karo Guddiga.
8. Sharcinnimada go'aannada Guddiga ka soo fulay ma saamayn doona Xubinimo ka banaanaatay ama nusqaan ka soo baxday magacaabista xubnaha ama ka saarid xubin ka reebanaansho sharci awgeed oo gadaal ka soo baxday.

9. Xubin kasta oo dano khaas ah ku leh hawl Bankiga la xiriira ama hindse isticmaal awood Banki waa inuu ka sheegaa danahiisa khaaska ah shir kastoo Guddiga arrinta uga hadlayo, ka dibna xubinta looma oggolaan doono innuu ka qayb galo codkiisana lama tirin doono ama laguma tirin doono tirada joogta ama xaadirka ah shirka looga hadlayo arrinta xubinta danaha gaarka ahi ugu jirraan .

**18. Ilaalinta Sirta**

1. Haddii aysan la xiriirin xil gudashadiisa ama fulinta awoodiisa Guddoomiyaha, Guddoomiye ku Xigeenka ama xubin Guddi maamul ama sarkaal kasta ama shaqaalaha Bankiga ma sheegi karaan, xataa kaddib marka ay shaqada ka baxaan, sir ay ku heleen ama ka ogaadeen xilka shaqadooda ama fulinta awoodahooda.
2. Qof kastoo jebiya Qodobka 1aad wuxuu noqon doonaa dembiile lagu qaadayo fal danbiedyada xeerka ciqaabta dalka, Ka sakaw talaabooyin anshax oo Guddiga Maamuka Bankigu garto.

## Qaybta 5aad
## Lacagta

**19. Lacagta Soomaaliya**

Hal beega lacagta Soomaaliya waa shilin Soomaali.

**20. Isticmaalka Lacagta**

Dhammaan waajibaadada lacageed ama heshiisyada macamil lagu galo Soomaaliya waxaa loo qaadan sidii iyadoo la qeexay lana diiwaan geliyey, waxaana lagu kala qaan bixi doonaa lacagta lagu muujiyey Qodobka 19 haddii aannu Sharcigu si Kale u dhigin ama dhinacyadu si kale ugu heshiinin.

**21. Soo saarida Lacagta Xaashiyaha iyo Sunuudda sharciga ah, iyo dib u Soo celinteedaba (beddelaad iyo suuq ka saarid)**

1. Bankiga Dhexe keliya ayaa leh awooda soo saaridda lacagta xaashiyaha iyo sunuuddaba Soomaaliya gudaheeda, lacagtaas keliya ayaana noqon karta sharci.
2. Bankiga Dhexe keliya ayaa yeelan doona awoodaha soo socda:

a. Go'aanka noocyadda lacagta la soo saarayo oo isugeynteedu noqayso doonta sharci.
b. Jaangoynta noocyada, waxa lagu dul qorayo, muuqaalka, waxa la samaynayo iyo tilmaamaha xaashida lacagta iyo sunuudda Bankigu soo saarayo, ayadoo lagala tashanayo wasiirka maaliyadda, laguna shaacinayo Faafinta Rasmiga ah iyo warbaahinta kale si dadweynaha loogu wargeliyo.

c. Dib u soo celinta (wareeg ka saaridda) lacagta xaashida ah iyo tan sunuuda ah oo Bankigu hore u soo saaray iyo dejinta nidaamka dib u soo celinta (wareeg ka saaridda).

Nidaamka dib u soo celinta kore waxaa lagu baahinaya Faafinta Rasmiga ah iyo waddadii kale oo Bankigu u garto in dadweynaha lagu wargeliyo.

**22. Beddelka Lacagta Geogo'day iyo Sunuudda**

Bankigu wuxuu nidaaminayaa (regulate), asagoo baahinaya, caddaynayaa shuruudaha looga baahanyahay in lagu dhammaystiro beddelka xaashiyaha lacagta iyo sunuudda haddii naqshada aan la akhrin Karin, la garan Karin, isbeddelay, dalooshamay iyo haddii aan in ka badan boqolkiiba afartan (40%) cabirkeedii lumay.

**23. Warqadaha Ballanqaadyada Sharciyeysan, sida Jeegaga Wareega , Kaambiyaaleyaal iyo qiimaleyda la midka ah.**

1. Bankigu wuxuu xeer lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ku maamnuuci karaa in cid kale oo aan Bankiga ahayn soo saarto: Warqadaha Ballanqaadayada Sharciyeysan, Kaambiyaaleyaasha iyo wixii la mid ah ee lacag naqdi ah ama amaah lagu kala qaadan karo ama situhu aragti ku sarrifan karo, wuxuuna Xeerku u kala samayn karaa shuruudo kala duwan Xaaladaha iyo marxaladaha taagan.
   Waxaana Xeerka ku jiri kara qodobo ciqaab ku soo rogaya ciddii jebisa Xeerka oo ganaax lacageed ama ciqaab xadhig ah hadba sidii Bankigu go'aamiyo.
2. Iyadoo loo hogaansamayo qodobada ku qoran Qodobkan, soo saaridda, Warqadaha Ballanqaadyada Lacagta, iyo Qaababka kale ku xusan qodobka 23aad faqradiisa 1aad. Aanu ka horimaan Xuquuqda keli ahaaneed ee Bankigu u leeyahay soo saarida xaanshi qaamedyo Soomaaliya ku astaysan.

## Qaybta Lixaad:
## Xiriirka Baarlamaanka Dawladda iyo Hay'adaha caamka ah.

**24. Baarlamaanka**

Guddoomiyahu ka dib codsiga Baarlamaanka ama Guddiyada Baarlamaanka ama isaga isxilqaankiisa wuxuu waqtiyada qaar hortagayaa oo uga warbixinayaa Baarlamaanka iyo Guddiyadiisa arrimaha ku saabsan Siyaasada Lacagta, arrimaha nidaamka Maaliyada, Maamulka Bankiga iyo xaalada dhaqaale ee Dalka.

**25. Kulanka Guddoomiyaha iyo Wasiirka Maaliyada**
Guddoomiyaha iyo Wasiirku waxay yeelan doonaan fadhiyo caadi ah kuna saabsan arrimaha lacagta iyo siyaasada Miisaaniyadeed, iyo arrimo kale oo ay wada daneeyaan. Guddoomiyuhu iyo Wasiirku waxay ambaqaadayaan inay gaadhaan heshiis, isla markaas ay isla socodsiiyaan midba midka kale wixii macluumaad ah ee wadajir u saameeya Bankiga iyo Wasaaradda.

**26. La Talinta Xukuumada**

1. Wasiirku wuxuu kala tashanaya Bankiga isla markaana weydiinayaa arrimaha ku saabsan hindisaha Miisaaniyadda qabyada ah ee Xukuumada iyo Xeerarka kale oo qabyada ah ee saamayn kara yoolka Kowaad ee Bankiga ee Lacageed. Ama si kale u saamayn kara awoodaha uu Bankigu ku higsanayo ujeedooyinkiisa, Bankiguna ka siinayo taladiisa sida ugu haboon.
2. Bankigu wuxuu dawladda talo ka siinayaa marka Bankiga fikirkiisa ay la noqoto arrin la xiriira shaqadiisa, awoodiisa iyo hawlihiisa inay saamayn ku yeelato Siyaasada Miisaniyadeed iyo gaaritaanka hawsha ugu muhimsan ee yoolkiisaa.
3. Bankigu wuxuu u jeedin karaa talo wasiirka arrin kasta oo Bankigu u arko inay khuseyso.

**27. Awaamiirta Dawladda**

1. Marka ay jirto xaalad gaar ah, ka dib marka uu la tashado Bankiga, hadduu Wasiirku u arko iney isku duwidda Siyaasada Lacagta iyo Miisaaniyada lagama maarmaan u tahay wuxuu talo bixin u gudbin karaa Ra'iisal Wasaaraha, nuqul talo bixinta ahna waxaa loo gudbinayaa Bankiga .
2. Bankigu haddii uu qabo diidmo ku saabsan soo jeedinta ku xusan faqrada 1aad, wuxuu qoraal diidmadiisa u gudbin karaa Ra'iisal Wasaaraha muddo 7 cisho gudahood ah laga bilaabo helitaanka nuqulka soo jeedinta.
3. Ra'iisal Wasaarahu isagoo taa ka duulaya wuxuu amar Wareegto ku go'aaminayaa Siyaasada Bankigu raaci lahaa Lixda bilood ee soo socota.
4. Ra'iisal wasaaruhu wuxuu qoraal Bankiga ku wargelinayaa Siyaasada la go'aamiyey iyo in Xukuumadu qaadanayso Mas'uuliyadda dhaqgelinta Siyaasadaasi.
5. Bankigu wuxuu raacaya go'aanka asagoo hirgelinayaa Siyaasada Mudada awaamirtaasi socoto.

6. Ra'iisal Wasaaruhu wuxuu Dadweynaha ugu soo saaraya qoraal lagu daabacayo Faafinta Rasmiga iyo innuu hordhigo Baarlamaanka muddo 30 cisho ah gudahooda ka dib marka Ra'iisal Wasaaruhu ku wargeliyo Bankiga Siyaasada la go'aamiyey:
   - Amarka Ra'iisal Wasaaraha sida ku xusan faqrad 3aad.
   - Soo jeedinta Wasiirka ee ku socota Ra'iisal Wasaaraha sida ku xusan faqrada 1aad.
   - Warbixinta Bankiga sida ku xusan faqrada 2aad isla qodobkan.

**28. Mamnuucidda Amaah siinta Dawladda iyo Hay'adaha caamka ah**

1. Bankigu uma fidin karro amah toos ah iyo mid dadban Dawladda iyo Wakaaladaha kale ee caamka ah, ama hay'ad dawladdu leedahay aan ka ahayn sida ay dhigayaan qodobkan iyo Qodobka 29aad.
2. Qodobada Faqradan hore ma khuseeyaan Bunuugta dawladdu leedahay iyo hay'adaha kale ee la kormeero ee Dawladdu leedahay, kuwaasoo loola dhaqmayo sida Bunuugta khaaska loo leeyahay iyo sida Hay'adaha kale ee la kormeero ee khaaska loo leeyahay.
3. Bankigu wuu iibsan karaa Warqadaha Damaanadaha Dowladda haddii iibkaas keliya lagu sameeyo heerka suuqa labaad.

**29. Horumarinta ku meel gaarka ee toos loo siiyo Dawladda**

Inkastoo diidmada lagu cadeeyey Qodobka 28aad, Bankigu wuu siin karaa Xukuumadda horumaris toos ah oo lagu daboolayo isdhinka, baaxadegga ama sabaynta u dhexeeya dakhliga Miisaniyadeed ee soo xeroota iyo kharashka Dawladda, haddi shardi ahaan horumaris kasta oo Dawladda sida Qodobkani dhigayo lagu siiyey:

a. damaanad ballanqaadyo qiimaysan oo la sarrifan karo ee Dawladda oo ku xadidan waqti aan ka dambeyn laba iyo toban bilood .
b. Yeelanayo korsaar ku qiimaysan heerka korsaarka suuqa ee Bankigu go'aamiyo.
c. Loo sameeyey keliya innuu si ku meel gaadh ah daboola baahida Xukuumada.
d. Waana inaysan shardi ahaan marna wadarta taagan ee horumarinta lagu bixiyey iyadoo la waafijinayo Qodobkan ka badnayn 15% Miisaaniyada Guud ee Dakhliga Xukuumada, sida ay muujinayso xisaabta Xukuumadda ay soo hantidhowreen hubiyeyaal iyo Hantidhowrka Guud sanadkii u dambeeyey.
e. Horumarin kasta oo Bankigu u fidiyo Dawladda, ee taagan waqti qodobkani dhaqangeliyo, waxaa loo qaadanayaa dayn Bankigu xukuumada ku amaahiyey si wafaaqsan heshiiska iyo shuuradaha Bankigu go'aamiyo.

f. Horumarin kasta waa in lagu damiinto dammaanadda Xukuumadda habka uu Bankigu u qeexi doono; iyo
g. Sida faqrada {d} loola jeedo, Miisaaniyadda Dakhliga caadiga waxay ka koobnaan doontaa cashuuraha Furdadaha, cashuuraha Berriga, khidmadaha, Kirooyinka, faa'idooyinka iyo dakhli ka yimaada maalgelinta ama ganacsiga waxaana ka baxsan deeqaha deymaha, dakhliga ka yimaada hanti Dawladeed oo laga iibiyey dadka gaarka ah, ama nooc kasta oo amaah muddo dheer ama mid muddo gaaban.

**30. Wakiil Miisaaniyadeed , Banki iyo Sarrifka Lacagaha Qalaad.**

1. Iyadoo si adag loo dhowrayo siduu sharcigani qabo mamnuucidda amaahsiinta Dawladda iyo Hay'adaha Dawliga ah, Bankigu wuxuu noqon doonaa Wakiilka keliya ee Miisaaniyadeed , Banki iyo ganacsadaha Sarrifka Lacagta Qalaad ee Dawladda iyo Hay'adaha Dawladda ee la cayimay.
2. Bankigu wuxuu kaloo ku shaqeyn karaa innuu noqdo wakiil Miisaaniyadeed iyo Bankiga hay'adaha kale ee Dawladda sidawaafaqsan heshiiska gaarka ah ee dhexmara Bankiga iyo Hay'adaha Dawladda (caamka ah).
3. Inkastoo Faqradaha 1aad iyo 2aad ee sare sidooda ahaanayaan, Wasiirku wuxuu u ogolaan karaa Hay'adaha Dawladda oo gaar loo tilmaamo iyo qaybo Dawladda ka mid ah inay la yeeshaan xiriir ganacsi isla markaas fuliyaan macamil dhaqaale ay la yeeshaan Bangiyada Ganacsiga.

**31.XilkaWakiil Miisaaniyadeed ahaan Banki iyo Sarrife Lacagaha Qalaad .**

1. Isagoo ah wakiilka Miisaaniyada, Banki iyo Sarrifaha Lacagaha Qalaad ee Dawladda iyo haddii Bankigu qabto shaqooyinka wakiil Miisaniyadeed iyo Sarrifka Lacagaha Qalaad ee Hay'adaha Dawladda, sida ku xusan faqrada Qodobka 30aad faqradiisa 1aad ama 2aad Bankigu wuxuu:

a. Noqon karaa Kayd hayaha Rasmiga ah ee Hay'adaha Dawladda ay khuseeyso, wuxuuna qaban karra wixii kayd ah isla markaasna wuxuu fulinayaa wixii Lacag bixin ee xisaabta Hay'adaas caamka ah.
b. Bankigu wuxuu u dooran karra Bangi kale innuu wakiil ugu noqdo kayd hayaha Rasmiga ah ee Hay'adaas meeshi aan Bankigu ku lahayn xafiis ama Laan.

c. Haynta iyo maamulka xisaabaadka gaarka ah ee Rasmiga sida ay ku heshiiyaan hay'ada dawladda ay khuseyso iyo Bankiga.
d. Isagoo ah Wakiilka Dawladda, innuu maamulo Deynta Dawladda oo ay ku jirto soo saaridda, bixinta korsaarka, iyo la soo noqoshada, ballanqaadyada iyo dammaanadaha Dawladda .
e. Bixinta ,dirista, ururinta iyo aqbalaada Kaydka iyo haynta lacagaha dalka gudihiisa ama dibediisaba.
f. Gadashada, iibinta, wareejinta ama aqbalaada haynta ee jeegaga, warqadaha ballanqaadyada iyo dammaanadaha/securities .
g. Ururinta dakhliga, ha ahaado Raasamaal ama korsaar ka soo baxay iibinta ama korarka korsaar ee Hay'adaha Dawladda ee dammaanadaha ama Hanti kale;
h. soo gato, iibiyo, wareejio aqbalo haynta dahabka ama Lacagta adag.

2. Bankiga ayey Dawladdu kala tashanaysa sida ugu haboon ee shuruudaha iyo xaaladaha intaanay gelin heshiis aamah lacageed ama waajibaad deymeed oo lacag qalaad ah, kana badan inta u dhiganta (……….) Shilin Soomaali ama soo saarka ballanqaadyada ee caddad kasta oo ku salaysan Shilin Soomaali (qiimaysan). Waxaa lagu soo saaridoonaa xeer gaar ah, oo ay soo saaraan golaha wasiiradda waqtiga ku haboon.

## Qaybta 7aad
## Xiriirka Dibedda

### 32. Nidaamka Sarrifka Lacagaha Qalaad iyo Kaydka Hantida Dibedda

1. Dawladdu waxay go'aamin doontaa nidaamka Sarrifka Lacagaha Qalaad innuu noqon doono hadba mid (sabaysa, go'an, ama hab kala gedisan) kaasoo loo adeegsan doono jaangoynta qiimaha Shilin Soomaaliga ku wajahan Lacagaha qalaad (Nidaamka Sarrifka Lacagaha Qalaad).
2. Bankiga wuxuu Dawladda ka codsan karaa inay go'aan ka gaadho nidaamka Sarrifka Lacagaha Qalaad, Codsigaasna Dawladdu waxay wax ugu qaban doontaa si degdeg.
3. Dawladdu waxay marka hore kala tashan doontaa Bankiga inta aanay go'aan ka gaadhin arrimaha Sarrifka Lacagaha Qalaad.
4. Bankigu wuxuu ku go'aan qaadanaya nidaamka Sarrifka Lacagaha Qalaad ee Dawladda go'aamisay. Haddii Dawladdu go'aamiso nidaamka Sarrifka Lacagaha Qalaad ee go'aan ama mid ka gedisan oo ku wajahan mid ama lacago badan oo qalaad, Bankigu wuxuu go'aaminaya heerka Sarrifka lagu dabaqayo ee uu u arko innuu si sax ah ula jaanqaadayo Ujeedada Kowaad ee Siyaasadda Lacagta si loo sugo loona xasiliyo ascaarta dalka gudihiisa.

5. Mar kasta Bankigu wuxuu inta awoodiisa ah ku dadaali doonaa innuu haysto kayd hanti dibadeed oo ah heer ku filan innuu baahida macaamilka dibedda ee Soomaaliya iyo ujeedooyinka Bankiga sida lagu qeexay sharcigan; kaydkuna wuxuu ka koobnaan doonaa dhammaan ama qaar ka mid ah kuwa soo socda:

a. SDR , Qaybta xuquuqda gaarka ah ku jirta Xisaabta loo qoondeeyey ay leedahay Soomaaliya ee Hay'ada Lacagta Adduunka (IMF).

b. Heerka Kaydka Soomaaliya ee Hay'adda Lacagta Adduunka.

c. Dahabka lagu , ama loo hayo xisaabta Bankiga , oo ka mid tahay haraaga ku jira xisaabaha ee u dhigma dahabkaas.

d. Lacag loo hayo kaash ama caddan oo lacag qalaad ah oo markiiba la sarrifi karro ama ku jira xisaabaha Bankiga.

e. Haraaga xisaabta ku jirta , iyo dhigaalka Bankiyada u dhexeeya oo lagu bixin karo aragti ama muddo gaaban oo ku salaysan lacago qalaad oo markiiba la beddeli karo , ee lagu hayo xisaabta Bankiga ee ka furan Bankiyada Dhexe ee dibedda ama Hay'adaha Maaliyada Caalamka

f. Damaanad deymeed oo markiiba la suuq gelin karro iyadoo ku salaysan Lacagta adag ee markiiba la sarrifi karro oo la suuq geliyey ama sidata aaminsanaanta iyo kalsoonida Dawladaha ajnabiga ah iyo Bankiyada Dhexe ee dibedda ama Hay'adaha Maaliyadeed ee caalamka.

g. Qaamayn ku maqan Hay'adaha Maaliyadeed oo Caalamka oo ka soo jeeda, dib u soo gadashada, iibin, iyo heshiisyada amaaheed ee dammaanadahaas ka soo jeeda

**33. Ka Ganacsiga Dahabka iyo Sarrifka Lacagaha Qalaad**

Bankigu wuxuu heerka suuqa ku soo gadan karaa , iibin karaa , soo dejin karaa , dhoofin kara , hayn kara ama si kale ugu macaamili karaa dahabka ama lacag qalaad ee la sarrifo sida hadba shuruudaha iyo nidaamka Bankigu go'aamiyo

**34. Xiriirka Bankiyada Dhexe ee Dibedda , Bankiyada Dibedda iyo Hay'adaha Caalamka ee Lacagta .**

Bankigu wuxuu xisaab ka furan karaa ama lacag dhigasho ka qaban Karaa ama lacag u hayn karaa ama qaamo lacageed u qaban karra Bankiyada Dhexe ee Dibedda , Bangiyada kale ee dibedda iyo Hay'adaha Lacagta ee Caalamka isagoo u qabanaya guud ahaan Bankiyadaas iyo Hay'adahaas howl banki

**35.Heshiisyada Lacag bixinta**
Dawladdu waxay Bankiga kala tashanaysaa gorgortanka heshiisyada Lacag bixinta ay gelayso Soomaaliya. Waxayna Bankiga u xilsaari Kartaa Maamulka heshiisyadaas Lacag bixinta.

**36.Wakiil Miisaniyadeed Hay'adaha Maaliyada ee Caalamka**
Bankigu wuxuu noqonayaa Wakiil Miisaniyadeedka dhamaan hay'adaha Dawladda Somalia xiriirka Maaliyadeed oo ay la leeyihiin hay'adaha Caalamka ay Soomaaliya xubin ka tahay ama Xiriir la leedahay.

**37. Kayd Haye**
Bankigu wuxuu noqonayaa kayd hayaha lacageed ay haystaan ama leeyihiin Hay'adaha dhaqaalaha Caalamka ay Soomaaliya xubin ka tahay ama ay Soomaaliya xiriir la leedahay .

**Qaybta 8aad**
**Xiriirka Bankiga iyo Hay'adaha Maaliyada**

**38. Kormeere iyo Bankiga Bankiyada kale iyo kormeere ama u fidiye Hay'adaha Maaliyada adeegyo Banki-oo-gaar ah .**

1. Bankigu wuxuu keli ahaan mas'uul uga yahay shuruucda, Ruqsada siinta, diiwaangelinta iyo Korjoogidda oo ay ku jirto ku soo rogidda tallaabooyin lagu hagaajinayo iyo ganaax ama cunaqabatayn Maamul lagu soo rogo Bankiyada iyo Hay'adaha Maaliyada /lacagta.
2. Bankigu wuxuu Bangiyada kale xisaab u furi karaa si ay kayd u dhigtaan iyo inuu u uruuriyo codsiyada lacagaha ku kala maqan xisaabaha Bankiyada.
3. Bankigu wuxuu xisaab u furi karaa, si uu kaydna ugu qabto uguna uruuriyo lacagaha ay is weydiistaan isha weydaarsadaan xisaabaha Hay'adaha Maaliyadeed ee Bankigu ruqsad siiyey kormeerana.

Bankigu wuxuu u fidin karaa adeeg dheeraad ah iyo tas-hiilaad loo arko in loo baahan yahay, aan ka ahayn fidin amaaheed, horumarsiyo iyo deymo ay ku jirto tas-hiilaad qaan kala gudasho qaababka lacagbixinta ee Hay'adahaas Maaliyadeed.

**39. Amaahsiinta Bankiyada**

1. Bankigu wuxuu siin karaa Bangiyada kale amaah ama horumaris leh muddo go'an oo aan ka badnayn lix bilood, taas oo rahmaad ay noqonayso Warqadaha ballanqaadyo Maaliyadeed ama dammaanada Dawlada oo Bankigu cayimay.
2. Bankigu si toos ah ama si dadban amaah uma siin karro Bangiyada kale aan ka ahayn sida ku xusan Qodobkan ama Qodobka 40aad.
3. Bankigu wuxuu go'aaminaya Qodobada iyo shuruudaha Guud uu amaah ugu fidinayo Bankiyada, wuxuuna si gaar ah Bankigu u go'aaminaya una sheegayaa heerka korsaarka laga qaadayo amaahda iyo horumariska loo fidiyo Bangiyada sida ku xusan qodobkan, waxaana kale oo u go'aaminayaa heerar korsaar oo kala duwan oo kala leh qaybo kale oo macaamilaad ah iyo waqtiga muddaysan ee kala duwan.

**40. Amaahsiiyaha ugu danbeeya ee Bankiyada**

1. Marka ay timaado xaalad aan caadi ahayn, Bankiga oo raacaya shuruudaha iyo Qodobada uu go'aamiyey, wuxuu noqonayaa amaahsiiyaha ugu dambeeya ee Bangiyada. Taageeradaas waxaa loo fidinayaa in loo sameeyo Bankigaas ama Bangiyada taakulo Maaliyadeed ama u noqonaysa Bankigaas faa'ido muddo aan ka badnayn 90 cisho oo uu u Bankigu cusboonaysiin karo, kuna salaysan barnaamij cadaynaya talaabooyinka Bankiga ay khuseyso qaadayo, iyadoo Bankigu xilqaadkaas samayn Karin ilaa:

a. Bankiga sida ay ugu muuqato in Bankigaasi yahay mid aan musalif ahayn oo keeni kara curraar ku filan , iyadoo codsiga taageerada Maaliyadeed ay ku salaysantahay baahi lagu hagaajinayo heerka dhaqdhaqaaaq(liquidity) Lacagta, ama:

b. In taageeradaas looga baahanyahay si loo ilaaliyo deganaanshaha nidaamka Maaliyadeed iyo iyadoo Wasiirka Maaliyaddu siiyo Bankiga dammaanad qoraal ah isagoo magaca Dawladda ku ballanqaadayso bixinta deyntaas.

2. Haddii Bankigu ogaado in Bankiga ay khuseysa uu fulin karri waayey barnaamijka la ogolaaday sida ku xusan faqradda qodobka 1; Bankigu wuxuu qaadaya tallaabooyinka ku haboon xaaladaha oo dhan, isugeynta waqtiga deynta iyo tas-hiilaadkaba loo fidiyeyna Kama badan karaan 180 maalmood.

**41. Shuruudaha Kaydka**

1. Bankigu isagoo raacaya ujeedinkiisa siyaasada lacageed, wuxuu waqti ilaa waqti bangiyada ka codsanayaa inay ku haystan xisaabaha ugu yaraan hadhaa u yaal Bankiga, si uu kayd ugu noqdo dhigaalka iyo qaamahooda kale.
2. Bankigu wuxuu xadidayaa isbarbardhiga Noocyada kala duwan ee qaybaha noocyada deymaha; wuxuu kaloo xadidayaa habka loo xisaabiyo cadadka wadarta qaanta ee Bankiga. Haseyeeshee isbarbardhiga tirooyinka la xadiday waa inay isla mid u noqdaan Bankiyada oo dhan. Haddii waxaan ku jirin faqrada qodobkan loo fasiran Karin inay ka hor istaagto Bankiga innuu u ogolaado Banki ama koox Bangiyo ah oo Qodobada ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan lagu fuliyo marka ugu horeysa, muddo ay ku soo dhammaystiraan Qaybta haibeega u dhiganta Lacagta dhigaalka looga baahan yahay sida uu Bankiga u xadido.
3. Inta la cayimo ama la kordhiyo inta ugu yar ee kaydka looga baahanyahay sida ku xusan faqrada 1aad ama faqrad 2aad ee Qodobkan waxay dhaqangelaysaa keliya marka ay dhammaato muddo 30 cisho ee la ogeysiiyo Bankiga innuu Bankiga ku talo jiro innuu talaabo ku haboon ka qaato.
4. Bankigu wuxuu saaraya Bangi kasta oo ku guuldaraysta innuu Ilaaliyo in ku filan heerka haraaga ugu yar ee lacagta la rabo sida ku xusan Qodobkan, waxaa lagu ciqaabi inta khidmo korsaar aan ka badnayn heer u dhigma heerka kororka sicir bararka sanadkaas taagan sida uu go'aamiyo Bankigu maalin kasta tirada lacagta dhiman maalin kasta oo heerka lacagtu dhimantahay.
5. Bankigu waxaa uu bixin karaa dulsaar haddii ay noqoto in uu la jaan qaadayo, ujeedooyinka siyaasadda lacagta. Heerka dulsaarkaas wuxuu ku salaynaanayaa xaddiga ugu yar ee Bankiga u yaal.

**42. Dhaqdhaqaaq Suuqa furan**

Iyadoo loola jeedo nidaaminta wareega lacagta, Bankigu wuxuu isagoo shuruudaha iyo Qodobada Guddigu cayimay, isagoo eegaya xadidida ku qoran Qodobka 28aad, wuxuu gadanayaa, haysanayaa ama iibinayaa dammaanada la sarrifi karro oo waqti kasta ku eg ay bixisay Dawladdu, ama damaanadaha kale oo sarrifma oo Bankiga cayimay.

## Qaybta 9aad:
## Warfaafinta iyo Tirokoobka

### 43. Warbixinta Bangiyada iyo Hay'adaha Maaliyadda

1. Bangiyada iyo Hay'adaha Maaliyadu waxay u gudbinayaan Bankiga waqti walba iyo sida Bankigu u rabo, warbixinaha iyo tirokoobka Bankigu si macquul ah ka dalbado si uu si fiican u guto waajibkiisa sida ku xusan Sharcigan iyo Sharciga Hay'adaha Lacagta.
2. Bankigu wuxuu soo saaraya qayb ama dhammaan waqtiyada ama sida ay u gartaan warbixin kasta ama tirokoob lagu sameeyey sida faqrad 1 iyadoo aan warbixintaas la soo saarayo aanay waxba ka sheegi Karin xaalada Maaliyadeed ee qof ama hawshiisa haddii aan ogolaansho qoraal marka horeba laga haysan qofkaas ama meherediisa.

### 44. Tirakoobka iyo Warbixinaha laga helo Cid shaksi ah iyo cid Sharci ahba

1. Bankigu wuxuu:

a. Uruurinayaa, diyaarinayaa, falanqaynayaa, qiyaasayaa soona saaraya Tirokoobka iyo warbixinta waxtarka u ah innuu fuliyo hawshiisa; iyo

b) In xeer hoosaad (regulation) lagu cadeeyo warbixinada tirokoobka loo Baahanyahay iyo qaababka warbixinadaas Loogu soo sameynayo Bankiga iyo cidda qof ahaaneed ama sharci ahaaneed oo laga rabo warbixinaha , iyo nidaamka Ilaalinta sirta iyo ganaaxa hawleed ee la saarayo hay'adaha ku shaqeynaya inay jebiyaan shuruudaha tirokoobka.

2. Hay'adaha ay khuseyso tirokoobka loo baahanyahay sida ku cad shuruucda ku xusan faqrad hoosaadka Qodobka 1. (b) ayaa laga rabaa inay Bankiga ku soo gaadhsiiyaan warbixinta laga rabo mudada laga rabo uu Bankigu u xadiday.
3. Bankigu wuxuu daaha ka qaadayaa:

a) Warbixino iyo tirokoobyo ku salaysan nidaamka Ilaalinta sirta sida xusan faqrada 1aad. (b).

b) In la qoraal geliyo qaabka la isticmaalay ee lagu soo uruuriyo; iyo

c) Tirokoobka iyo macluumaadka iyo fikradaha oo suurtgelinaya in dadka kale xaqiijin/hubin karaan tirakoobka Bankigi soo saaray.

## Qaybta 10aad,
## Nidaamka xallinta iyo qaan kala gudashada iyo saamiyada

### 45. Tas-hiilaad , Ruqsad siin iyo Kormeer

1. Bankigu wuxuu fidin karaa, fududeyn karaa si loo xaqiijiyo nidaam hufan oo xalin iyo is ogolaysiinta, Lacag bixinta iyo nidaamyada isla meel dhigidda damaanadaha iyo saamiyada. Bankigu wuxuu awood u leeyahay innuu habeeyo, ka qayb qaato iyo innuu fuliyo u kala wareejinta qaamaha, bixinta iyo isla meel dhigida nidaamyada damaanadaha iyo xilqaadyada.
2. Bankigu wuxuu si khaas ah uga masuul noqon doonaa ilaalinta nidaamka, Ruqsad siinta iyo kormeerka, oo ay ku jirto ku soo rogidda tallaabooyin sixitaan ah iyo cunaqabatayn maamul ah, ee u kala wareejinta xisaabaadka, lacag bixinaha, iyo nidaamka isla meel dhigida damaanadaha.
3. Bankigu wuxuu Xeer ku soo saaraya:

a) In cid kasta oo ka shaqeysa kala wareejinta xisaabaadka, lacag bixinta iyo nidaamka isla meel dhigidda dammaanadaha looga baahan yahay inay Ruqsad qaataan.

b) cid kastoo ka shaqeysa kala wareejinta qiimalayda , lacag bixinta iyo nidaamka isla meel dhigida damaanadaha, ama kala wareejinta qiimalayda, lacag bixinaha iyo nidaamka kala wareejinta qiimalayda inay ilaaliyaan si sugan oo xaalad macquul ah iyo shuruudaha sida uu u dejiyo Bankigu; iyo

c) Innuu nidaam sharci u dejiyo isla markaasna kormeero qaybinta iyo tayada qaababka lacag bixinta.

## Qaybta 11aad ,
## Qodobada Maaliyada

### 46.Sanad Maaliyadeed

Sanad Maaliyadeedka Bankiga wuxuu la mid noqon doonaa Sanad Maaliyadeedka Dawladda , Xisaabaadka Bankigana waxaa la xiri doonaa dhamaadka sanad Maaliyadeed kasta -31 December ee sanad kasta.

### 47.Warbixin Xisaab Sanadeed , iyo Xisaab Xidh Bille ah oo hordhac ah

1. Bankigu wuxuu ka diyaarinayaa xisaab xir sanadeed Sanad Maaliyeedkiisa
2. (Saddex) bilood gudahood ka dib xisaab xidh sanadeed kasta, Bankigu wuxuu u gudbinayaa Wasiirka , wuxuuna u dirayaa nuqullo Baarlamaanka , Madaxweynaha iyo Ra'iisal Wasaaraha warbixin sanadeedka Xisab Xidh Sanadeedka sanadka la soo dhaafay oo kooban sidan:

a) Xisaab Xirka oo uu ogolaaday Guddiga Maamulka Bankigu isla markaas saxeexay Guddoomiyuhu isla markaasna ay xaqiijiyeen Hantidhowrayaasha Dibeddu.
b) Warbixin , uu ogolaaday Guddigu , kuna saabsan shaqooyinkiisa iyo hawlgalka sanadka xisaab xidhka la soo dhaafay , si khaas ahna u khuseysa ujeedooyinkiisa siyaasadeed iyo dhacdooyinka saameyn ku yeeshay dhaqaalaha Soomaaliya .
c) Warbixin uu ogolaaday Guddiga Maamulka Bankigu kuna saabsan xaalada dhaqaale ee Xisaab Xidhka Sanadka la soo dhaafay , oo ay ku jirto saadaalin dhaqaale ee sanadka soo socda ; iyadoo xoogga la saarayo ujeedooyinkiisa siyaasadeed ee xaalada nidaamka Maaliyadeed ee Soomaaliya. Warbixinta waa inay ku jirtaa dib u eegid iyo qiimayn Siyaasada Bankigu raacay ee Sannadka la soo dhaafay iyo innuu sharaxaad iyo fasiraad ka bixiyo siyaasada uu Bankigu ku dhaqmayo mudada sanad xisaabeedka soo socda .

3. Marka la dhammaystiro, Bankigu wuxuu soo saarayaa warbixin xisaabeed ku xusan qodobkan faqrad 2 (a) kuna soo saaro Faafinta Rasmiga ah iyo Bogga Websaydka Bankiga , Warbixinaha ku xusan faqrad 2aad.(b) iyo (c) iyana waa in la daabacaa.
4. Bankigu muddo toban maalmood oo shaqo ka dib dhammaadka bisha , waa innuu diyaariyaa soona saara Xisaab Xidh ku meel gaadh ah dhamaadka bil kasta , nuqullo xisaab xidhkaas ka mid ahna loo diraa Wasiirka laguna daabacaa Faafinta Rasmiga ah iyo Bogga Websaydka ee Bankiga .

**48. Xisaabaadka, Hantidhowrka iyo Miisaniyada.**

1. Bankigu wuxuu habaynayaa xisaab iyo qoraallo ku salaysan Qaabka Xisaab Xir Maaliyadeedka ee Caalamka , ama sida kale ee heerarka nidaam Xisaabeed ee Caalamka si ballaaran looga aqoonsanyahay ee Bankiyada Dhexe iyo Hay'adaha Waaweyn ee Maaliyadeed eeCaalamka si ay uga muuqdaan hawlihiisa iyo Xaaladdiisa Maaliyadeed.
2. Hantidhowrka gudaha , oo u magacaabay Guddiga Maamulka Bankigu , waa innuu leeyahay aqoon iyo waayo aragnimo uu ku xaqiijiyo in si sax ah loo dhaqan geliyo nidaamka iyo heerka xisaab Xir Maaliyadeed ee Caalamka ama kuwa la midka ah heerarka Xisaabaadka Caalamka , isla sida uu faray Guddoomiyuhu , innuu u hirgeliyo uguna warbixiyo Guddoomiyaha in la fuliyey go'aanada Guddiga iyo innuu wixii cadaymo kale ah sida uu faray Guddoomiyuhu

3. Hantidhowrayaasha Dibeda, ee uu magacaabay Guddiga Maamulka Bankigu, haystana ogolaanshaha Wasiirka , waa inay waayo aragnimo u leeyihiin Hantidhowrka Bankiyada waaweyn ee Caalamka iyo Hay'adaha Maaliyadeed ee Caalamka sida wafaaqsan heerka warbixinaha xisaabeed ee Caalamka ama mid kuwa ku xiga heerka Xisaabaadka Caalamka .
4. Bankigu wuxuu diyaarinayaa Miisaaniyad sanadeed oo uu ogolaanayo Guddiga Maamulka Bankigu ka hor bilowga missaniyad sanadeed kasta. Miisaaniyada la ansixiyey waxaa la ogeysiinayaa Wasiirka si uu u ogaado.
5. Dhammaan dakhliga iyo dheefta la filayo innuu soo saarayo Bankigu ama meelo kale Bankiga laga siiyey , iyo sida la qiyaasayo kharashka oo ku jiro qiima dhaca iyo ku talo galka waa in lagu muujiyaa sanad Miisaaniyeedka.

**49. Kaydka Guud iyo Kaydka Xisaabaha dib u qiimaynta aan weli la xaqiijin**

1. Bankigu wuxuu furayaa, isla markaa haynayaa Xisaabta Kaydka Guud. Xisaabta Kaydka Guud lama isticmaali karo haddii aanay ujeedadu ahayn in laga daboolo khasaarooyin Bankiga soo gaaray.
2. Bankigu wuxuu furayaa Xisaabta Kaydka Guud ee dib u qiimaynta aan weli la xaqiijin ee xaalada lacagaha Qalaad. Dahabka, qaababka Maaliyadeed iyo hantida kale.

**50. Dheefta la Qaybsan karro**

1. Saafiga Faa'idada iyo khasaaraha Bankiga waxaa lagu bandhayaa si la mid tahay heerka warbixinaha Caalamka ama kan ku xiga ee ah heer Caalamku si ballaaran ugu dhaqmaan Bankiyada Dhexe iyo Hay'adaha Maaliyada Caalamka ee waaweyn
2. Qaybinta dheefta ee la qaybinayo waxaa lagu go'aaminayaa sida :

a) Iyadoo laga jarayo Faa'idada Kama dambeynta ah wadarta guud ee Faa'idooyinka dib u qiimaynta aan la xaqiijin, iyo iyadoo loo Qoondaynayo cadad in la mid ah midda xisaabta kaydka ee dib u Qiimaynta aan la sugin ; iyo

b) Iyadoo laga jarayo xisaabta kaydka dib u qiimaynta aan la xaqiijin, iyo ayadoo lagu darayo dheefta la qaybinayo cadadka faa'iido aan la xaqiijin oo laga jaray faa'idada kama dambeysta ah ee sanad ama sanado hore oo lagu xaqiijiyey xisaab xidhka sanadka soo socoda.

3. Khasaaraha ka dhashay dib u qiimaynta aan la xaqiijin waxaa loo wareejinaya kan la midka ah xisaabta kaydka dib u qiimaynta aan la xaqiijin inta laga gaarayo in xisaabta Kaydka dib u qiimaynta haraagoodu noqda eber, iyadoo khasaarahaas laga dabooli doono sanadka socda faa'idooyinka iyo Xisaabta Kaydka Guud iyo ka dib Raasamaalka .
4. muddo (6) bilood gudahood ka dib sanad xisaabeedka ,Guddigu wuxuu u qoondeynayaa kala qaybinta dheefta sida tan :
   a) Lacag u dhiganta (Ugu yaraan 50%) boqolkiiba ee dheefta la qaybinayo waxaa lagu shubayaa xisaabta Kaydka Guud ilaa Raasamaalka la ogolaaday iyo Xisaabta Kaydka Guud ay la mid noqdaan (10%) boqolkiiba wadarta Hantida Maaliyadeed ee Bankiga; iyo.
   b) Wixii dheef la qaybin lahaa ka hadhay waxaa lagu wareejinayaa dawladda si ay u noqoto dakhli ku aadan Miisaaniyada Guud ee Dawladda .
5. Looma qaybin karro faa'idadii hore la haystay iyo dakhliga socda ee Bankiga si ka duwan inta lagu ogolaaday faqrada 4aad ee qodobkan.
6. Haddii sanad xisaabeed uu Bankigu galo khasaare qaybsi, Khasaaraha waxaa marka hore laga jarayaa Xisaabta Kaydka Guud ka dibna waxaa laga jari doonaa Raasamaalka.

**51. Hoos u dhac Raasamaalka**

1. Haddii ay dhacdo warbixinta Xisaab Xidhka Sanadeedka Bankiga ee la hubiyo in qiimaha Hantida ka hoos maro qiimaha qaanta Bankiga iyo Raasamaalka la ogolaaday oo aan la taaban iyo Kaydka Guud , ka dib:
   a) Guddiga Maamulka Bankigu, isagoo tixgelinaya talada Hantidhowrayaasha Dibedda ee Bankiga, wuxuu qiimaynayaa xaaladda, wuxuu diyaarinayaa Warbixin sababta iyo baaxad ay le'egyahay hoos u dhacu, iyo innuu qiimeeyo xaalada muddo aan ka badnayn 30 Cisho gudahood.
   b) Haddii uu Guddigu ansixiyo warbixinta la xiray, wuxuu Bankigu Weydiisannayaa Wasiirka Maaliyada taageero Raasamaal ay Dawladdu siiso si dhibka hoos u dhaca loogaga baxo.
   c) Marka la hello codsigaas, Wasaaradu waxay muddo aan ka badnayn 30 Cisho, u wareejinaysaa Bankiga cadadka lacagta loo baahanyahay lacag ahaan ama iyadoo ah qaababka daynta lagu maamulo, oo leh muddo cayiman laguna soo saaray heerarka korsaarka suuqa ku xidhan ee markaas taagan.

## Qaybta 12aad
## Nidaamka xeerarka

### 52. Qaababka Xeer hoosaadyada

1. Bankigu wuxuu yeelanayaa awood innuu soo saaro Xëer hoosaadyo loo baahanyahay si uu u fuliyo shaqada Bankiga loo xilsaaray sida ku cad Sharcigan iyo qaanuunada kale.
2. dhammaan go'aamada Xeerka khuseeya in ka badan Hay'ad waxaa laga soo saaraya Wareegtooyin Awaamiir ah .
3. Bankigu wuxuu soo saari karaa amar khuseeya Hay'ad ama cid keliya.
4. Amarada iyo xeer hoosaadyada u soo saaro Bankigu waa inay u hogaansamaan kooxda ama cidda ay ku socoto.

### 53. Baahinta Xeer hoosaadyada

1. Awaamiirta uu soo saaro Bankigu waa lagu daabacaa Faafinta Rasmiga waxayna dhaqan geliyaan taariikhda la daabacay ama taariikhda lagu xusay oo ku cad qaababka Xeerka.
2. Bankigu wuxuu go'aaminayaa soo saarida wareegtooyinka iyo awaamiirta.
3. Bankigu wuxuu habaynayaa Diiwaan caam ah oo lagu kaydiyo Wareegtooyinka ama amarrada la faafiyey.

## Qaybta 13aad
## Warbixinaha Siyaasada Lacagta iyo warbixino kale

### 54. Warbixinnada Siyaasada Lacagta

Bankigu muddooyin ay u dhaxayso ugu badnaan lix bilood wuxuu soo saaraya una soo bandhigaya dadweynaha warbixino ku saabsan Siyaasada Lacagta 12ka bilood ee soo socota, oo laga rabo:

a) Innuu ku cadeeyo siyaabaha uu Bankigu ku xaqiijin karro in la gaaro yoolka siyaasaddiisa.
b) Innuu ku cadeeyo sababaha uu u qaatay Siyaasada iyo habraacyada la xiriira
c) Inay warbixinta ay ku jirto dib u eegid iyo qiimayn hirgelinta iyo horusocodka mudada ay la xiriiraan warbixinnada Siyaasadu.

**55. Faafinaha Kale**

1. Bankigu wuxuu ugu yaraan laba jeer sanadkii iyo marka loo baahdo uu ogeysiinayaa Baarlamaanka iyo dadweynaha Siyaasadiisa Lacageed iyo gaaritaanka himiladiisa iyo aragtidiisa ku wajahan xaqiiqada qaybaha dhaqaalaha.
2. Bankigu wuxuu soo saari karaa warbixino iyo daraasado ku saabsan arrimaha Maaliyada iyo dhaqaalaha oo uu u arko inay ku haboon tahay.

**Qaybta 14aad**
**Qodobo qubane ah**

**56. Hawlo dheeraad ah ee Bankiga laga maamnuucay**

Ka sokow hawlaha laga mamnuucay ee Sharcigan lagu sheegay, Bankigu kama shaqayn karro:

a) Ganacsi ka shaqeyn, lahaansho ama ku lahaansho qayb toos ee baayacmushtar, beero, warshado iyo shaqo wax la mid ah, marka laga reebo haddii uu deyn ka maqan ku soo ceshanayo, markaas oo kalana waxaa hantidaasi laga takhalusayaa waqtiga ugu haboon ee ugu horeeya.

b) Bankiga waxa loo oggolyahay in uu Hantidiisa ma guurtada ah kireeyo, haddii ay ugu muuqato in ay tahay mid ka badan baahida shaqooyinkiisa iyo shaqaalihiisa, markuu ogolaado guddiga maamulka Bankiga.

c) Bankiga waa kireysan karaa guryo Soomaaliya ama Dibadda ku yaala oo uu shaqaadiisa ku fushado, meeshii aanu hanti ma guurto ah ku laheyn, markuu ogolaado guddiga maamulka Bankiga.

d) Bixin iyo qabashada warqadaha ballan qaadyada bixinaha aan ka ahayn (kuwa aragti ku bixinta).

e) Damaanadqaadka deyn , horumarin ama maalgelin .

**57. ka Ilaalin Mas'uuliyad Qaamaynta Shaqsi ahaaneed**

Ficil ama howlfulin uu qabtay sarkaal Bankiga ama qof kasta oo kale oo fulinaya amarka Bankiga, haddii ficilkaas ama howshaas loo qabtay niyadsami lagu fulinayo xilka shaqada/amarka Bankiga, sarkaikaas ama qofkaas looma qabsan karo qaan, ficil, weydin ama tallaabo kasta oo kale.

**58. Shuruucda la nasakhay**

Sharci ama Qodob Sharci kasta oo ka horimaanaya ama la socon Karin Sharcigan ayaa la nasakhay intiisa khuseysa Bankiga .

## Qaybta 15aad,
## Qodobada Kala Guurka

### 59. Magacaabida hore ee Xubnaha Guddiga Maamulka Bankiga

1. Laga bilaabo taariikhda Sharcigan dhaqangalo, dhammaan xubnaha Guddiga Maamulka Bankiga waxaa lagu magacaabayaa hab waafaqsan Qodobka 13aad, marka laga reebo kuwa soo socda :

Magacaabista u horeysa mudada xafiisku waxay noqon doontaa :

- Guddoomiyaha (Afar) sano
- Guddoomiye ku Xigeenka (Afar) sano
- Iyo xubnaha kale aan fulinta ahayn (Hal, laba, Saddex, afar iyo shan) sano siday u kala horeeyaan.

### 60. Xeer ka soo saarid Sharciga

1. Bankigu wuu soo saari karaa awaamir gudaha ah oo waafaqsan sharcigan si uu u fuliyo awoodaha uu sharciganu siiyay.
2. Bankiga Dhexe ee Soomaaliya iyo Banki Kasta ee la samayn doono, waa inay isu qaabeeyaan, isuna diyaariyaan sidii loo hergelin lahaa mustaqbalka dhow hab bankiyeedka Islaamiga ah.

### 61. Warbixinaha Siyaasada Lacagta

Markuu Sharcigani dhaqangalo siduu Qodobka 53aad dhigayo waxaa lagu soo saaraya muddo (18) bilood ah warbixinta Siyaasada Lacagta ee Bankiga ee ugu horeysa .

### 62. Adeega Bankiga ee Guud

1. Si loo xaqiijiyo in dadweynahu helaan adeeg Banki oo habboon , Bankigu laga bilaabo taariikhda Sharcigani dhaqangalo. Wuxuu dadweynaha u fidinaya adeegyada iyo macaamilka Bankiyeed oo habboon ilaa inta ay Bankiyada Ganacsigu iyo Bankiyada horumarintu ka buuxinayaan kaalintooda,
2. Adeega Guud ee macaamilka Bankiga waxaa ku jiraya ,iyadoo aan intaas lagu koobayn:

a) Qabashada dhigaalka Lacagta
b) Amaah qaadashada
c) iibsashada, gadidda, sarrifaad iyo sii sarrifaad khidmo , Warqadaha ballanqaadayada iyo Kambiyaaleyaasha.
d) Samaynta Warqadaha Kalsoonida (L/C).
e) Soo saaridda ballanqaadyada, jeegaga dibeda, iyo fulinta Wareejinta lacagaha.
f) Aqbalaada Curraarta; iyo
g) Xafidaadda Qiimalayda si khasnada loogu hayo.

3. Bankiga wuxuu sida ku xusan Qodobkan u fidin karraa dadweynaha deymo xadidan oo gaar ama ujeedo ganacsi leh, marka ay lacagta inta taagan waqti kasta ka yartahay (Saddex) boqolkiiba marka loo eego Raasamaalka Bankiga.

## Qaybta 16aad,
## Qodobka ugu dambeeya

### 63. Dhaqangalka

Sharcigan wuxuu dhaqan gelyaa (Hal bil) ka dib taariikhda marka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah.

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 147, taariikh 05/05/2012
**Magacaabid Guddiga dib u eega Xukunada Maxaabiista**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:** - Qodobka 39aad, Farqadda 1aad "c", Qodobka 44aad Farqadda 1aad Xarafka "e" Axdiga KMG ah

**Markuu tixgeliyay:**- Soo jeedinta Wasiirka Garsoorka, Awqaafta & Arrimaha Diinta Summad WGAAD/XW/D-9/327/2012 ee 29/04/2012

**Markuu garwaaqsaday:** - Inay jirto baahi deg-deg ah oo loo qabo in xal loo helo xaaladda adag oo ay ku sugan yihiin maxaabiista ku xiran Xabsiyada Dalka.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan (Lr. 147)**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka Madaxweynuhu saxiixo dekreetadan waxaa la magacaabay Guddiga dib u eegidda Xukunada Maxaabiista, waxaana Xubnaha ka mid ah:-

| | | |
|---|---|---|
| 1. Dr. C/laahi Aadan Isaaq | Guddiga Adeegga Garsoorka | Guddoomiye |
| 2. Avv. Xasan Cali Axmed | Wasaarada Garsoorka | Xubin |
| 3. Sh. Cali Max'ud Macallin | Wasaarada Garsoorka | Xubin |
| 4. Avv. C/kariin Xasan Gorod | Xafiiska Qareenada Soomaliya | Xubin |
| 5. G/dhexe C/laahi Buule Camey | Wasaarada Arrimaha Gudaha | Xubin |

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galaya marka uu saxiixa Madaxweynaha J.S., waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MUQDISHO 05/05/2012

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 156, taariikh 05/05/2012
**Magacaabid Ku-Xigeenka Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:** - Qodobka 39aad, Farqadda iyo Qodobka 44aad, Xarafka "e" ee Axdiga KMG ee Jamhuuri0yadda Soomaaliya

**Markuu arkay:**- Xeerka Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda Lr. 11 ee soo baxay 5ta December 2006.

**Markuu arkay:** - Warqadda Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada Sumad JS/XM/AG/0319/04/12 ee ku taariikhaysan April, 26, 2012.

**Markuu arkay:** - Aqoonta iyo Waayo-aragnimada Mudanaha jagadan loo magacaabayo.

**Wuxuu soo saarayaa Xeerkaan (Lr. 156)**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka Madaxweynaha JS saxiixo Xeerkaan Waxaa Mudane Cabdi Max'ed Axmed loo magacaabay Jagada Ku-xigeenka Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada J.S.

**Qodobka 2aad**

Mudanaha kor ku xusan waxuu ku meeleysan yahay Darajada AY-3 sida uu qabo Qodobka 17aad (2) ee Xeerka Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dawladda Lr. 11 soo baxay 5ta December 2006.

**Qodobka 3aad**

Wixii xuquuq iyo mamuus ah waxaa lagu dhaqayaa Xeerka kor ku xusan.

**Qodobka 4aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galaya marka uu saxiixa Madaxweynaha J.S., waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 05/05/2012

Madaxweynaha J. Soomaaliya
*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 197, taariikh 23/05/2012

**Meel-marinta Go'aanka ka soo baxay Shirka Wadatashiga Saxiixayaasha ee Addis-Ababa, Itoobiya**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay: -** | Qodobka 39aad Faqradda 2aad ee Axdiga FKMG |
| **Markuu arkay:-** | Qodobka 75 ee Dastuurka 1960kii |
| **Markuu tixgeliyay: -** | Go'aannada Garowe I, Garowe II iyo Gaalkacyo |
| **Markuu arkay: -** | In loo baahan yahay in laga baxo Xilliga Kala-guurka |

**Wuxuu soo saarayaa Xeerkaan Maamul**

**Qodobka 1aad**

Waxaa la meel-mariyay Go'aanka ka soo baxay Shirkii Wadatashiga ee lagu qabtay Addis Ababa 23ka Maajo 2012 oo ay wada saxiixeen Saxiixayaasha Garowe I, Garowe II iyo Gaalkacyo, go'aankaasoo ku lifaaqan isla xeerkan

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee jamhuuriyadda.

MUQDISHO 23/05/2012

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

PRESIDENTIAL DEGREE No. 173, date 28/05/2012

**The Establishment of the independent Anti-Corruption Commisson**

PRESIDENT OF SOMALIA

**After having seen: -** Article 39, Paragraph 2 and Article 44, Letter "e" of the Transitional Charter.

**After having seen:-** Article 68, Paragraph 1 of the Transitional Charter,

**After having seen: -** Law No. 108 of 08/02/1968- Establishment of Anti-corruption Office; XRW/LT/00.225/04/12 of 26/04/2012

**Having Considered:** The letter of proposal of the Council of Ministers Ref.: XRW/LT/00.225/04/12 of 26/04/2012

**The president Decrees the following**

**Article 1**

On the Data the president of Somali Republic signs this Decree, the Members of the Independent Commission are appointed.

**Article 2**

The Commission is independent from other Government Institutions and has Legal Personality.

**Article 3**

The names and the positions of the Members are the following:

| | |
|---|---|
| 1. Mrs. Khadra Mohamed Essa | Chairman of the Commission |
| 2. Mr. Mohamed Barre Kusow | Deputy-Chairman |
| 3. Mr. Ibrahim Mo'allim Hussein | Member |
| 4. Mr. Hadi Omar Abdullahi | Member |
| 5. Mr. Abdirisaaq Nuh Hassan | Member |
| 6. Mr. Suleiman Yusuf Elmi | Member |
| 7. Mrs. Shamso Ibrahim Mohamud | Member |
| 8. Mrs. Najma Mohamed Jama | Member |
| 9. Mr. Hussein Kassim Yusuf | Member |

**Article 4**

The Administration and the Tasks shall be regulated by the Gobernment Civil Personnel Law No. 11 of 06/12/2006

**Article 6**

This law shall take effect on the day the president of Somalia signs and shall be published in the Official Bulletin of the Somali Republic.

MUQDISHO 28/05/2012

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 173, taariikh 28/05/2012
**Magacaabis Guddiga La-dagaallanka Musuqmaasuqa**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad, Faqradda 2aad iyo Qodobka 44aad, Xarafka "e" ee Axdiga KMG ah ee Jamhuuriyadda Soomaalia.

**Markuu arkay:-** Qodobka 68aad, Farqadda 1aad ee Axdiga KMG

**Markuu arkay: -** Xeer Lr. 10 ee soo baxay 13/02/1968, kuna saabsan Nidaamka Xafiiska Baarista Musuqmaasuqa

**Markuu arkay: -** Xeer Madaxwayne Lr. 108 ee 08/04/1968 ee ku saabsan Nidaamka Xafiiska Baarista Musuqmaasuqa

**Markuu tixgeliyay: -** Soo jeedinta Golaha Wasiirrada kuna qoran Warqadda Ra'iisul Wasaaraha Lr. XRW/LT/00.225/04/12 ee 26/04/2012.

**Wuxuu soo saarayaa Xeerkaan soo socda:**

**Qodobka 1aad**

Laga Billaabo Marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya saxiixo Xeerkaan, waxaa la magacaabay Guddiga La-dagaallanka Musuqmaasuqa.

### Qodobka 2aad

Waxuu Guddiga yeelanayaa Shaqsiyadda Sharci ah, waxuuna ka madax bannaan yahay Hay'adaha kale ee Dawladda.

### Qodobka 3aad

Waxuu Guddiga ka kooban yahay magacyada iyo jagooyinka soo socda:

| | |
|---|---|
| 1. Marwo Khadra Maxamed Ciise | Guddoomiye |
| 2. Mudane Maxmed Barre Kusow | Guddoomiye Xigeen |
| 3. Mudane Ibraahim Macallin Xuseen | Xubin |
| 4. Mudane Haadi Cumar Cabdulaahi | Xubin |
| 5. Mudane Cabdirisaaq Nuur Xasan | Xubin |
| 6. Mudnae Suleyman Yusuf Cilmi | Xubin |
| 7. Marwo Shamsa Ibrahim Maxamud | Xubin |
| 8. Marwo Najma Maxamed Jaamac | Xubin |
| 9. Mudane Xuseen Qaasin Yuusuf | Xubin |

### Qodobka 4aad

Waxaa Guddigan lagu maasuusayaa inta ay hayaan xilalkooda kuna gudo jiraan hawlahooda waxaa lagu dhaqayaa Xeerka Shaqaalaha Rayidka Dawladda Lr. 11 ee soo baxay 06/12/2006.

### Qodobka 5aad

Waxuu Xeerkan dhaqan galayaa isla markii uu Madaxwaynaha saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Soomaalia .

MUQDISHO 28/05/2012

Madaxweynaha J. Soomaaliya
*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 177, taariikh 29/05/2012
**Magacaabid Guddoomiyaha Hay'adda Maareynta Masiibooyinka Qaranka**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad, Farqadda 1aad "C", Qodobka 44aad Farqadda 1aad Xarafka "e" Axdiga KMG ah

**Markuu la tashaday:-** Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka KMG

**Markuu arkay: -** In jagada Guddoomiyaha Hay'adda Maareynta Masiibooyinka Qaranka ay bannaan tahay ayna lagama maarmaan tahay in la buuxiyo Jagadaas loona magacaabo ciddii hoggaamin laheyd Hay'addaas

**Markuu arkay: -** Aqoonta iyo Waayo-aragnimada dheeraadka ah uu leeyahay Mudanaha jagadan loo magacaabayo

**Wuxuu soo saarayaa Xeerkaan (Lr. 177)**

**Qodobka 1aad**

Waxaa lagama maarmaan noqotay in Hay'adda Maareynta Masiibooyinka loo magacaabo ciddii hoggaamin laheyd si dib loogu soo nooleeyo Hay'adihii udub dhexaadka u ahaa Qaranimada Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad**

Waxuu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya u magacaabay Avv. **Cabdullaahi Maxamed Jimcaale** in uu noqdo Guddoomiyaha Hay'adda Maareynta Masiibooyinka.

Qodobka 3aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galaya marka uu saxiixa Madaxweynaha J.S., waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.
MUQDISHO 29/05/2012

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 202, taariikh 14/06/2012
**Laalid Qodobbada Qaarkood ee Axdiga KMG**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad, Faqradda 2aad ee Axdiga KMG.

**Markuu arkay:-** Qodobka 71, Faqradda 2aad ee Axdiga KMG

**Markuu arkay: -** Xeer Madaxweyne Lr. 197 ee 23/05/2012 kuna saabsan Go'aanka ay Saxiixayaasha ku gaareen Addis Ababa- Itoobiya.

**Markuu ogaaday: -** In kalfadhiyada Baarlamaanka uu dhab ahaan u qabsoomi –waayeen

**Isaga oo tixgelinaya: -** Qodobada Heshiisyadii Garowe 1, Garowe II iyo Gaalkacyo

**Markuu garwaaqsaday: -** In lagu jiro Xaalado Adag, waxaa lagama maarmaan ah si looga baxo Xilliga KMG loona gaaro Dawladnimo buuxda

---

**Wuxuu soo saaray Xeerkan**

**Qodobka 1aad**

Waxuu Madxweynaha laalay Qodobada 28(1)-33, Xarafka "C" iyo Qodobka 34 ee Axdiga ku meel-gaarka, waxuuna awooddiis Madaxweyne si waafaqsan Sharciga kula wareegay xeerkan, isaga oo raacaayo qodobka 1aad ee Heshiiska lagu gaaray Shirkii Wadatashiga ee ka dhacay Addis Ababa 21-23-2012.

**Qodobka 2aad**

Waxaa kaloo Madaxweynaha isticmaalayaa awoodaha sharciga waafaqsan iyo qodobada qaarkood ee ku xusan Dastuurkii 1960 si uu u fuliyo waajibaadka ka saaran sidii looga gudbi lahaa xilliga kala-Guurka ee Dawladda Federalka Soomaaliya

**Qodobka 3aad**

Waxaa kale oo uu la laalay Qodobka 11, Farqaddiisa 3aad, Xarafka "b" ee Axdiga KMG, waxaana si ku meel-gaar ah u ansixin doono Golaha Ansixinta Dastuurka (CA) ee Xubnahiisa ay soo xuli doonaan Odayaasha Dhaqanka, si dardar loo geliyo habsami u socodka hirgelinta Road Map-ka, dhammaystirka

Qabyo-Qoraalka Dastuurka iyo hab dhismeedka Baarlamaanka ku meel gaarka, wuxuuna Madaxweynaha ku soo saarayaa Xeer hadba waqtiga la joogo, waxaana gaar ahaan uu la laali doonaa qodobka 29aad ee Axdiga KMG.

**Qodobka 4aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galaya marka uu saxiixa Madaxweynaha J.S., waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 14/06/2012

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 204, taariikh 17/06/2012

**Dib ugu celin Hanti Maguurto ah ee**
**Dhaxaltooyadii Marxuum S/Guuto Salaad Gabayre Kediye,**
**Marxuum S/Guuto Maxamed Caynaanshe Guuleed**
**Iyo Cabdulqaadir Dheel**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad, Faqradda 2aad ee Axdiga KMG

**Markuu arkay:-** Xeerka Lr. 54 ee soo baxay 10/09/1970 waxaana xeerkan iyo Xeerarka la midka ahaa ee ka soo horjeeday Xuquuqul Insaanka lagu baabi'iyey Dastuurka 14/10/1990.

**Markuu arkay: -** Qodobka 4aad, Farqadda 4aad ee Xeerka Lr. 6 ee ku saabsan Maamulka Dhismaha ee Gobolka Banaadir soona baxay 17/12/1980

**Markuu ogaaday: -** In ay jiraan Hanti maguurto ah oo si sharci darro ay Xukuumaddii Militariga ula wareegtay, ka dibna la siiyay dad aan xaq u lahayn, taasi oo si barer ah uga hor imaanaysay Xaqa Lahaanshaha Hantida Maguurtada ah.

**Isaga oo tixgelinaya: -** Caddaalad Bulshadeedka iyo Xaqa ay Shacabka u leeyihiin Lahaanshaha Hanti Maguurto ah

**Wuxuu soo saaray Xeerkan**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo Maalinta uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya saxiixo Xeerkaan, waxaa Hantidii Maguurtada ahayd oo ay lahaayeen Marxuum S/Guuto Salaad Gabayre Kediye, Marxuum S/Guuto Maxamed Caynaanshe Guuleed iyo Marxuum Cabdulqaadir Dheel dib loogu celiyay dadkii dhaxallooda lahaa, isla xeerkaan waxaa dib loogu soo celiyay Magacyada iyo Maamuuskii ay ku lahaayeen Shacabka iyo Xoogga Qaranka Soomaaliyeed, bacdamaa ay kaalin wax ku ool ah ay ka soo qaateen dhismaha iyo abaabulka lagu asaasay Xoogga Qaranka Soomaaliyed.

**Qodobka 2aad**

Waxay hantidaasi maguurtada oo ah dhulal banana iyo dhismooyin horay u lahaayeen saddexda Marxuum ay ku yaalaan Duleedka iyo Gudaha Gobolka Banaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxaa Xeerkaan lagu amrayaa dadka haysto Dhulalkaas ama dhismooyinkaasi in ay dib ugu soo celiyaan dhaxaltooyada Reer Marxuum S/Guuto Gabayre Kediye, Reer Marxuum S/Guuto Maxamed Caynaanshe Guuleed iyo Reer Marxuum S/Guuto Marxuum Cabdulqaadir Dheel

**Qodobka 4aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galaya marka uu saxiixa Madaxweynaha J.S., waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 17/06/2012

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*